**Tariikh: 09/11/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.144**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA**

XRW - BIXIT
12 NOV 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 1aad farqadda 11aad ee Sharci LR.003 ee soo baxay 08/ Maarso 2023 Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay REF.WAG/XWD/703/23 ee ku taariikheysan 04/11/2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Wasaaradda Amniga loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

**Qodobka 3aad**

Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-117-23
TAARIIKH: 11-12-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA
XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الأمن الداخلي
مكتب وزير الدولة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
**Ministry of Internal Security**
**Office of the State Minister**

**Ref.WAG/XWD/ 703 /23** **Tr: 04/11/2023**

**Ku : Ra'iisul Wasaaraha XFS** **=Muqdishu=**
**Og : Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha** **=Muqdishu=**

**Ujeeddo: Codsi Gudbin Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed.**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Amniga Gudaha Waxa ay halkaan si xushmada iyo qadarin ku dheehan tahay kugu soo gudbineysaa Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed, Mudane Ra'iisul Wasaare xeerkaan oo baahi weyn ay u qabto Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed si uu u dhamaystirmo xeerkeeda.

Waxaan markale Mudane Ra'iisul Wasaare kaa codsaneynaa in xeerkan aad u gudbiso Golaha Wasiiradda Xukuumada Fadaraalka Soomaaliya ee Dan Qaran si ay u meel mariyaan Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed

**Mahadsanid,**

**Eeg Lifaaqa hoose ee xeerka.**

XUKUUMADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA
XAFIISKA W. DOWLAHA
OFFICE OF THE STATE MINISTER
MINISTRY OF INTERNAL SECURITY

**Xil. Maxamed Cali Xagaa**
**K/S Wasiirka ahna**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.**

**MINISTRY'S ADDRESS: MAKA-AL-MUKARAMA MAIN ROAD, MOGADISHU, SOMALIA**
**Mobilka:+252 619057777 Eamail StateMinister@Mois.gov.so**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tariikh: 09/11/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.144**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA**

XRW - BIXIT
12 NOV 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 1aad farqadda 11aad ee Sharci LR.003 ee soo baxay 08/ Maarso 2023 Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay REF.WAG/XWD/703/23 ee ku taariikheysan 04/11/2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee **09/11/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

## Qodobka 3aad

Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA
XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الأمن الداخلي
مكتب وزير الدولة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
**Ministry of Internal Security**
**Office of the State Minister**

**Ref.WAG/XWD/ 703 /23** **Tr: 04/11/2023**

**Ku : Ra'iisul Wasaaraha XFS** **=Muqdishu=**
**Og : Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha** **=Muqdishu=**

**Ujeeddo: Codsi Gudbin Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed.**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Amniga Gudaha Waxa ay halkaan si xushmada iyo qadarin ku dheehan tahay kugu soo gudbineysaa Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed, Mudane Ra'iisul Wasaare xeerkaan oo baahi weyn ay u qabto Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed si uu u dhamaystirmo xeerkeeda.

Waxaan markale Mudane Ra'iisul Wasaare kaa codsaneynaa in xeerkan aad u gudbiso Golaha Wasiiradda Xukuumada Fadaraalka Soomaaliya ee Dan Qaran si ay u meel mariyaan Xeer Nidaamiyaha Hay'ada Sirdoonka & Nabad Sugida Qaranka Soomaaliyeed

**Mahadsanid,**

**Eeg Lifaaqa hoose ee xeerka.**

**Xil. Maxamed Cali Xagaa**
**K/S Wasiirka ahna**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.**

MINISTRY'S ADDRESS: MAKA-AL-MUKARAMA MAIN ROAD, MOGADISHU, SOMALIA
Mobilka:+252 619057777 Eamail StateMinister@Mois.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب محامي العام للدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

**SUMMAD: XGG/444/2023** **04/11/2023**

**Ku: Wasaaradda Amniga Gudaha** **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Og: Xafliska Ra'lisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Gudbin Xeer Nidaamiye**

Xaffiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda oo tixraacaya Warqadda Summad: WC&AD/XAWSH&H823/2023, ee ku taarikheysan 01/11/2023, Ujeeddadeeduna ahayd: SOO-Gudbin =XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA=

Xaffiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shago si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Janaayo 1976, waxa uu halkan ku soo gudbinayaa "Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka" oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shago, uguna bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay Xeer-nidaamiyahan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh fududeynta iyo fulinta hawlaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasirrada si ay u ansixiyaan, maadaama uu waafaqsan yahay Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, Sharci Lr.004 ee 08/03/2023, islamaarkaana awood u sinaya Wasaaardda samaynyta Xeer-Nidaamiye sida ku xusan Sharciga Hay'adda.

Ugu dambeen, Xafiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasirrada iyo Wasaaradda Amniga Gudaha in Nuqulka ku lifaagan warqaddan uu yahay nuquika loo gudbinayo Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan, maadaama Xaffiska Garyaqaanka Guud uu ku samayey saxitaan yo toosin nuqulka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka u soo gudbisay, islamarkaana uu ku kordhiyey Qodobka 115aad: Wax ka bedelka Xeer-Nidaamiyahan.

FG: Halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan iyo warqadda Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka

Salaan qadarin leh

**Qareen: Axmed Faarax Axmed**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام لدولة

Address: State House, Villa Somalia
Tel: +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
**Office of Director Legislation and Agreement Department**

**Summad: WC&AD/XAWSH&H/823/2023** **Tr. 01/11/2023**

Mudane Garyaqaan;

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABADSUGIDDA QARANKA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu hagayo hawlaha Hay'adda.

Hindisahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Amniga Gudaha, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada ka guto, si habraaca ansixintu u dhammeystirmo

**Wada shaqeyn wacan**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 02/11/2023

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=



Dr. Ahmed

JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

# XEER-NIDAAMIYAHA

# Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka

# (XN-HSNQ)

**2023**

# TUSMO

**ARAR** ........ **10**
**CUTUBKA KOWAAD** ........ **13**
**QODOBBO GUUD** ........ **13**
Qodobka 1aad ........ 13
Eray-bixin ........ 13
Qodobka 2aad ........ 14
Magaca iyo Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha ........ 14
**CUTUBKA LABAAD** ........ **15**
**WAAJIBAADKA GUUD EE CIIDANKA HSNQ** ........ **15**
Qodobka 3aad ........ 15
Dhaarta ........ 15
Qodobka 4aad ........ 15
Qaadashada ama Qorista Xubno Cusub ........ 15
Qodobka 5aad ........ 16
Waajibaadka Shaqo ee Ciidanka ........ 16
Qodobka 6aad ........ 17
Amar Ciidan ........ 17
Qodobka 7aad ........ 17
Asaluub (Dishibiliin) Ciidan ........ 17
Qodobka 8aad ........ 17
Nadaafadda Qof Ahaaneed ........ 17
Qodobka 9aad ........ 18
Kala-sarreynta Ciidanka ........ 18
Qodobka 10aad ........ 18
Derejada Ciidanka HSNQ ........ 18
Qodobka 11aad ........ 19
Dallacaadda Ciidanka HSNQ ........ 19
Qodobka 12aad ........ 20
Faafinta Derejada Iyo Dallacaadda ........ 20
Qodobka 13aad ........ 20
Sheegashada Derejo Been ah ........ 20

Qodobka 14aad ..... 20
Tababarrada Ciidanka HSNQ ..... 20
Qodobka 15aad ..... 21
Labbiska (Dirayska) Ciidanka ..... 21
Qodobka 16aad ..... 21
Hubka iyo Agabka Ciidanka ..... 21
Qodobka 17aad ..... 22
Hoggaansanaanta Ciidanka ..... 22
Qodobka 18aad ..... 22
Qaadasho Tallaabo Degdeg ah ..... 22
Qodobka 19aad ..... 22
Adeegsiga Garaadaha Ciidanka ..... 22
Qodobka 20aad ..... 23
Bedelka iyo Eregta ..... 23
Qodobka 21aad ..... 23
Waxyaabaha ka Reebban Ciidanka HSNQ ..... 23
Qodobka 22aad ..... 23
Bandhig Codsi ama Cabasho iyo Habka Gudbinta ..... 23
Qodobka 23aad ..... 24
Ilaalinta Sirta iyo Agabka Ciidanka ..... 24
Qodobka 24aad ..... 24
Xilka iyo Mas'uuliyadda Ciidanka HSNQ ..... 24
Qodobka 25aad ..... 25
Dhowrista Dastuurka iyo Sharciyada Dalka ..... 25
**CUTUBKA SADDEXAAD ..... 26**
**SHAQADA IYO AWOODAHA HSNQ ..... 26**
Qodobka 26aad ..... 26
Xiriirka Arrimaha Dibadda ..... 26
Qodobka 27aad ..... 26
Wakiillada Hay'adda ee Dibadda ..... 26
Qodobka 28aad ..... 27
Ku Meelaynta Xubnaha Hay'adda Laamaha Kale ee Dawladda ..... 27
Qodobka 29aad ..... 28

Amniga Xarumaha Dawladda ........................................................................ 28
Qodobka 30aad ........................................................................ 28
Maamulka iyo Jiheynta Amniga Hoteellada iyo Goobaha Ganacsiga ........................................................................ 28
Qodobka 31aad ........................................................................ 28
Daryeelka Xubnaha Hay'adda ........................................................................ 28
Qodobka 32aad ........................................................................ 29
Adeegyada Gurmadka Degdegga Ah ........................................................................ 29
Qodobka 33aad ........................................................................ 29
Qaadashada Aqoonsiyo Kala Duwan ........................................................................ 29
Qodobka 34aad ........................................................................ 30
Barnaamijyada ku Mataaneysan HSNQ ........................................................................ 30
Qodobka 35aad ........................................................................ 30
Hubinta Ajaanibta ........................................................................ 30
Qodobka 36aad ........................................................................ 31
Kaaliyaha Noqonaya Sii-hayaha ama Ku-simaha Xilka AG ........................................................................ 31
**CUTUBKA AFARAAD ........................................................................ 32**
**NIDAAMKA XARUMAHA BAARISTA HSNQ ........................................................................ 32**
Qodobka 37aad ........................................................................ 32
Hannaanka Baarista Dembiyada ........................................................................ 32
Qodobka 38aad ........................................................................ 32
Mas'uuliyadda Taliyaha Baarista ........................................................................ 32
Qodobka 39aad ........................................................................ 33
Ciidanka Ilaalada Xarumaha Baarista ........................................................................ 33
Qodobka 40aad ........................................................................ 33
Mas'uuliyadda Xeer-ilaalinta Guud ee CQS ........................................................................ 33
Qodobka 41aad ........................................................................ 33
Booqashada iyo Kormeerka Taliyaha Hay'adda ........................................................................ 33
Qodobka 42aad ........................................................................ 34
Kala Saaridda Xabsiyada iyo Maxaabiista ........................................................................ 34
Qodobka 43aad ........................................................................ 34
Xuquuqda Dadka Ay Hay'addu Hayso ........................................................................ 34
Qodobka 44aad ........................................................................ 35
Fatashaadda Maxaabiista ........................................................................ 35

Qodobka 45aad ... 35
Hantida Iyo Alaabta Maxaabiista ... 35
Qodobka 46 ... 35
Nadaafadda Xarumaha Baarista ... 35
Qodobka 47aad ... 36
Nolosha Iyo Daryeelka Maxaabiista ... 36
Qodobka 48aad ... 36
Booqashada iyo Xiriirka Ehellada Maxaabiista ... 36
Qodobka 49aad ... 37
Cabashada Maxaabiista ... 37
Qodobka 50aad ... 37
Daryeelka Bukaannada iyo Takoorka Maxaabiista Qaba Cudurrada Faafa ... 37
Qodobka 51aad ... 37
Adeegsiga Xoogga ... 37
Qodobka 52aad ... 38
Dembiyada Xabsiyada ... 38
Qodobka 53aad ... 38
Anshax-marinta Maxaabiista ... 38
Qodobka 54aad ... 39
Dhimashada Maxbuuska ... 39
Qodobka 55aad ... 39
Xarumaha Dhaqancelinta Xubnaha Argagixisada ... 39
**CUTUBKA SHANAAD ... 41**
**DHISMAHA IYO NIDAAMINTA GUDDIGA ANSHAX-MARINTA EE HSNQ ... 41**
Qodobka 56aad ... 41
Xeerinta Anshax-marinta Xubnaha Hay'adda ... 41
Qodobka 57aad ... 41
Qaab-dhismeedka Guddiga Anshax-marinta ... 41
Qodobka 58aad ... 42
Guntanka (Kooramka) iyo Habka Go'aannada Guddiga Anshax-marinta ... 42
Qodobka 59aad ... 42
Xaaladaha Xubinta loo Wareejinayo Guddiga Anshaxa ... 42
Qodobka 60aad ... 43

Go'aannada Guddiga Anshax-marinta ........ 43
Qodobka 61aad ........ 43
Nidaamka Guud ee Anshax-marinta ........ 43
Qodobka 62aad ........ 44
Xuquuqda Qofka Eedda loo Haysto ........ 44
Qodobka 63aad ........ 44
Waxyaabaha ka Reebban Xubinta Eedda loo Haysto ........ 44
Qodobka 64aad ........ 45
Muddo-dhaafka Eedda ........ 45
Qodobka 65aad ........ 45
Gelidda Fal Dhalin Kara Ganaax Asluubeed ama Faldambiyeed Culus ........ 45
Qodobka 66aad ........ 46
Ganaaxyada Asluubeed Iyo Cidda Bixin Karta ........ 46
Qodobka 67aad ........ 46
Xabsi Ku-meel-gaar ah ........ 46
**CUTUBKA LIXAAD ........ 47**
**FASAXYADA, MAQNAASHO FASAX LA'AAN IYO FAKADKA ........ 47**
Qodobka 68aad ........ 47
Noocyada Fasaxyada ........ 47
Qodobka 69aad ........ 47
Fasaxa Sanadlaha Ah ........ 47
Qodobka 70aad ........ 47
Fasaxa Umusha ........ 47
Qodobka 71aad ........ 48
Fasax Waxbarasho Dalka Dibadiisa ah ........ 48
Qodobka 72aad ........ 49
Fasaxa Caafmaadka ........ 49
Qodobka 73aad ........ 49
Fasax Gaar ah ........ 49
Qodobka 74aad ........ 49
Habka Codsiga Fasaxyada ........ 49
Qodobka 75aad ........ 50
Ku Daahidda Fasaxa ........ 50

Qodobka 76aad ........ 50
Maqnaashaha Sarkaalka Fasax La'aan ........ 50
Qodobka 77aad ........ 50
Fakadka Sarkaalka ........ 50
Qodobka 78aad ........ 51
Maqnaashaha Askariga Fasax La'aan ........ 51
Qodobka 79aad ........ 51
Fakadka Askariga ........ 51
Qodobka 80aad ........ 51
Xuquuq Hakin iyo Baafin ........ 51
Qodobka 81aad ........ 52
Dib u Soo Noqoshada Xubinta ........ 52
Qodobka 82aad ........ 52
Maqnaashaha Muddo Bil ka Badan ........ 52
Qodobka 83aad ........ 52
Go'aanka ugu Dambeeya ........ 52
**CUTUBKA TODOBAADAAD ........ 53**
**BILLADAHA SHARAFTA IYO ABAALGUDKA XUBNAHA HSNQ ........ 53**
Qodobka 84aad ........ 53
Noocyada Abaalgudyada (Abaalmarinnada) Xubnaha HSNQ ........ 53
Qodobka 85aad ........ 53
Ammaan ........ 53
Qodobka 86aad ........ 53
Abaalgud Fasax ah ........ 53
Qodobka 87aad ........ 54
Shahaado Sharaf ........ 54
Qodobka 88aad ........ 54
Abaalgud Lacageed ........ 54
Qodobka 89aad ........ 54
Ammaan loo Shirsan Yahay ........ 54
Qodobka 90aad ........ 54
Billad Sharaf Geesinimo ........ 54
Qodobka 91aad ........ 55

Noocyada Billad Sharafeedka ........ 55
Qodobka 92aad ........ 55
Habka Bixinta Billadaha ........ 55
Qodobka 93aad ........ 56
Xaqsiinta Mutaystaha Billadda ........ 56
Qodobka 94aad ........ 56
Dallacaad Muteysi Gaar ah ........ 56
Qodobka 95aad ........ 57
Maamuusidda Qof Dhintay ........ 57
Qodobka 96aad ........ 57
Samaynta Fal Geesinimo Leh Dhowr Jeer ........ 57
Qodobka 97aad ........ 57
Abaalgudka Dadweynaha ........ 57
**CUTUBKA SIDDEEDAAD ........ 58**
**GEFEFKA ASLUUBEED EE LIDDIGA KU AH WAAJIBAADKA CIIDANNIMO IYO SHAQO ........ 58**
Qodobka 98aad ........ 58
Mas’uuliyadda Ku Xadgudubka Sharciga ........ 58
Qodobka 99aad ........ 58
Feer-celinta Sarkaalka Iyo Askariga ........ 58
Qodobka 100aad ........ 58
Si xun ula Dhaqmidda Ciidanka ........ 58
Qodobka 101aad ........ 59
Xaqa Dacwadda iyo Cabashada Xubnaha Hay’adda ........ 59
Qodobka 102aad ........ 59
Habraaca iyo Muddada Dacwad Gudbinta ........ 59
Qodobka 103aad ........ 60
Adeegsiga Maandooriye ........ 60
Qodobka 104aad ........ 60
Shaqo Ka-joojin ........ 60
Qodobka 105aad ........ 61
Shaqo Ka-saaris ........ 61
Qodobka 106aad ........ 61
Ka-xayuubin ama Dhimis Derejo ........ 61

Qodobka 107aad ........ 62
Sababaha Xubin Xuquuqdiisa Looga Hakin Karo ama Looga Jari Karo ........ 62
**CUTUBKA SAGAALAAD........63**
**MUSHAARKA, GUNNOOYINKA IYO XAQSIINTA XUBNAHA HSNQ........63**
Qodobka 108aad ........ 63
Nidaaminta Xuquuqda Xubnaha HSNQ........ 63
Qodobka 109aad ........ 63
Xaddiga Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha ........ 63
Qodobka 110aad ........ 63
Maamulka Iyo Maaraynta Maaliyadda HSNQ........ 63
Qodobka 111aad ........ 63
Hantida HSNQ........ 63
Qodobka 112aad ........ 64
Maamuuska Iyo Mudnaanta Madaxda Sare Ee HSNQ........ 64
Qodobka 113aad ........ 64
Hawlgabka iyo Xaqsiinta ........ 64
Qodobka 114aad ........ 65
Ku Xadgudubka Qodobada Xeerka ........ 65
Qodobka 115aad ........ 65
Wax Ka Beddelka Xeer-Nidaamiyahan. ........ 65
Qodobka 116aad ........ 66
Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha ........ 66

**<u>XEER Lr. 144</u> ee soo baxay <u>09/11/2023</u>. Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda (HSNQ)**

## ARAR

Iyadoo la fulinayo Amarka Madaxda Sare ee Dalka, lagana anba qaadayo **baahida weyn ee loo qaba**y in shaqada, awoodaha iyo dhammaan arrimaha **Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda (HSNQ)** khuseeya ay noqdaan kuwa qeexan oo sharciyad ku salaysan; waxaa la diyaariyey Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (HSNQ).

Taariikhdu markii ay ahayd <u>12-kii Desembar 2022</u> ayaa **Wasiirka Amniga Gudaha** Hindise-sharciyeedka HSNQ ku lifaaqay codsiga soo-jeedinta iyo gudbinta, ka dib markii uu helay ra'yiga iyo talada **Garyaqaanka Guud ee Qaranka**.

Sidoo kale, <u>5-tii Jannaayo 2023</u>, ayaa **Golaha Wasiirradu** cod aqlabiyad ah ku ansixiyey Hindise-sharciyeedka Hay'adda, isla taariikhdaas ayaana **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS** amray in si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka.

Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka wuxuu Golaha Shacabka gaaray taarikhdu markay ahayd <u>7-dii Jannaayo 2023</u>, ka dibna wuxuu maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad.

**Golaha Shacabka** wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee **Dastuurka KMG** ku ansixiyey Hindisaha HSNQ <u>6-dii Febaraayo 2023</u>, isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda dastuuriga ah uga gutaan.

**Golaha Aqalka Sare** wuxuu asna dhankiisa ansixiyey <u>22-kii Febraayo 2023</u> isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga bedelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG.

Taariikhdu markii ay ahayd <u>28-kii Feebaraayo 2023</u>, ayaa Golaha Shacabku Hindise-sharciyeedka HSNQ u gudbiyey **Madaxweynaha JFS** si waafaqsan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG, si uu u meel-mariyo, isla markaana loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda una noqdo Sharci dhaqangal ah, si waafaqsan Qodobka 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Ugu danbayntii, Madaxweynaha JFS ayaa <u>8-dii Maarso 2023</u> **saxiixay**, isla

markaana **meel-mariyey** Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, Sharci Lr.004 ee 08/03/2023, waxaana lagu soo saaray **Faafinta Rasmiga ah**, sidaas ayuuna Sharciga HSNQ dhaqangal ku noqdey.

Sharciga HSNQ wuxuu qeexay Mabaadi'da hagaysa shaqada Hay'adda, wuxuuna xeeriyey arrimaha asaasiga ah ee khuseeya qaab-dhismeedka Hay'adda, maqaamkeeda sharciyeed, shaqadeeda iyo awoodaheeda. Wuxuu kaloo caddeeyey xuquuqda asaasiga ah ee xubnaha Hay'adda, awoodahooda, waxayaabaha ka reebban, waajibaadka iyo hawl-gelinta ciidanka iyo arrimo kale oo muhiim u ah shaqada HSNQ.

**Dhanka kale**, sharciga HSNQ wuxuu caddeeyey in HSNQ yeelaneyso **Xeer-nidaamiye** dhammeystiraya isla markaana faahfaahinaya arrimo badan oo shaqada HSNQ lama huraan u ah, oo sharciga Hay'addu u dhaafay in Xeer-nidaamiyuhu xeeriyo. Xeer-nidaamiyahaas oo uu soo saari doono Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99[aad], farqada (b) ee Dastuurka KMG ah.

Waxyaabaha muhiimka ah ee sharciga HSNQ uu tilmaamay in lagu nidaamiyo ama uu u xawilay in loo raaco si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Hay'adda waxaa ka mid ah:

- **a)** Faahfaahinta hannaanka shaqo-ka-saaridda, keyd-gelinta iyo xil-ka-qaadista xubnaha Hay'adda (Qdobka 12[aad] faqradaha (3) iyo (4), lala akhriyay Qodobka 28[aad] ee sharciga Hay'adda);
- **b)** Waajibka Agaasimaha Guud (Taliyaha) ee Hay'adda ka saaran ilaalinta iyo meel-marinta Sharciga, Xeer-nidaamiyaha iyo Xeer-hoosaadka HSNQ (Qodbka 12aad (8));
- **c)** Qeexidda Kaaliyaha noqonaya sii-hayaha xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda markii uu bannaanaado sabab ay ahaataba (Qodobka 14aad (2));
- **d)** Nidaaminta mushaaraadka, gunnooyinka iyo guud ahaan xuquuqda xubnaha Hay'adda (Qodobka 23aad, lala akhriyay Qodobka 25aad).
- **e)** Nidaaminta derejooyinka iyo dallacaadda ciidanka iyo guud ahaan xubnaha Hay'adda (Qodobka 25aad (7) iyo Qodobka 27aad (4));
- **f)** Habka cabashada iyo dacwad sheegashada xubnaha Hay'adda iyo cid kasta oo heshiis kula shaqeeya HSNQ (Qodobka 30aad);
- **g)** Meelaha kale ee sharciga Hay'addu Xeer-nidaamiyaha ku tilmaamay waxaa ka mid ah: (Qodobka 12aad (6), Qodobka13aad (4) iyo Qodobka 21aad (7)).

# CUTUBKA KOWAAD
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Eray-bixin

1. Haddii aan Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa si kale loogu sheegin, ereyada soo socda, waxay yeelanayaan macnaha iyo fasiraadda mid kasta ku hor qoran:
   a) **Xeer-nidaamiye**: Waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya hawlaha Hay'adda, laguna dhaqan-gelinayo sharciga HSNQ isla markaasna ay soo saaraan Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99aad (b) ee Dastuurka KMG iyo Qodobada Sharciga HSNQ.
   b) **Xeer-hoosaad**: Waa Xeer maamul oo hagaya laguna socodsiinayo shaqada joogtada ah ee HSNQ, waxaana soo saara Agaasimaha Guud/Taliyaha ee HSNQ si waafaqsan Qodobka 1aad (12) iyo Qodobka 6aad (3) ee Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan.
   c) **Golaha Wasiirrada**: Waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirrada Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   d) **Taliyaha**: Waxaa loola jeedaa Taliyaha / Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.
   e) **Ku-sime**: waa mas'uul si ku-meel-gaar ah u haya xil inta uu qofkii ku magacawnaa uu xafiiska ku soo laabanayo, waxaana xilka u dhiiba isla qofka jagada haya ee dalka uga maqnaanaya safar, fasax ama duruuf caafimaad awgeed.
   f) **Sii-haye**: waa mas'uul haya xil qofkii hayay aanu ku soo noqoneyn oo uu dhintay ama xilka laga qaaday ama uu is-casilay, wuxuuna sii-hayuhu xilka hayaa ilaa laga magacaabo ama laga doorto qofkii xilkaas qaban lahaa.
   g) **Xubin:** Xubanaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.
   h) **Ciidan**: Ciidanka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad sugidda Qaranka.
   i) **Amar-ciidan**: waa amar kasta oo ka soo baxa madaxda ama taliyeyaasha ciidanka heer kasta oo ay tahayba, kuwaas oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn, joogidda, tegista meeshii qof kasta lagu

qeybshey, dhigista wax kasta meesha ku habboon iyo gudashada waajib kasta waqtigii iyo sidii loogu talagalay.

j) **Asluub ama Dishibiliin ciidan**: waa caadeysiga ilaalinta anshaxa, xeerarka ciiddannimo iyo gudashada waajibaadka ciiddannimo si sax ah oo xil-kasnimo iyo daacadnimo ku jirto.

k) **Anshax**: waxaa loola jeedaa hab-dhaqan iyo caado ku salaysan mabaadi', qiyam iyo xeerar ay tahay in la ilaaliyo laguna dhaqmo oo tilmaamaya sida habboon iyo sida aan habboonayn.

l) **Anshax-marin**: edbinta iyo ganaaxidda qof ku dhacay wax liddi ku ah anshaxa, isla markaana ay bixiso cid awood sharci u leh, si waafaqsan sharciga;

m) **Adeegsiga Maandooriye:** isticmaalka wax kasta oo xiska (maanka) qofka bedeli kara ama waxyeello maskaxeed ama sakhraamid keeni kara muddo gaaban ama dheer, qaabkii la doonaba ha loo adeegsadee, sida: cunid, cabid, dhuuqid, ursasho, durid cirbad, shidasho iwm.

n) **Saldhig mushaar:** waxaa loola jeedaa mushaar bileedka xubinta oo aan Gunno lahayn;

o) **Hawlgab:** waxaa loola jeedaa xubin gaaray da'da shaqo ka-fariisiga ee ku qeexan sharciga HSNQ.

2. Xuruufta hoos ku xusan mid kasta waxaa laga soo gaabiyey ereyada ku hor qoran:
   a) **HSNQ**: Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;
   b) **XN-HSNQ**: Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;
   c) **XH-HSNQ**: Xeer-hoosaadka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka;
   d) **AG**: Agaasimaha Guud ee HSNQ.

## Qodobka 2aad
## Magaca iyo Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (XN-HSNQ)**".
2. Xeer-nidaamiyahan ujeeddadiisa waxaa ka mid ah arrimaha soo socda:

a) Meel-marinta Qodobbada 12aad, 13aad, 14aad, 21aad, 23aad, 25aad, 27aad iyo 30aad ee sharciga HSNQ, Qodobbadaas oo tilmaamaya in HSNQ yeelaneyso Xeer-nidaamiye faahfaahinaya ama nidaaminaya arrimo uu sharciga Hay'addu xeeriyey;
b) Caddeynta iyo faafaahinta arrimaha dhammeystirka u baahan ee la xiriira shaqada Hay'adda;
c) Daboolidda baahiyaha taagan ee ku aaddan nidaaminta awoodaha, hawlaha iyo gudashada waajibaadka HSNQ.

## CUTUBKA LABAAD
## WAAJIBAADKA GUUD EE CIIDANKA HSNQ

### Qodobka 3aad
### Dhaarta

1. Qof kasta oo xubin ka noqonaya Ciidanka HSNQ, waa inuu maraa dhaarta faqradda soo socota ku xusan, si waafaqsan Qodobka 20aad ee sharciga HSNQ, xubnuhuna waxay u dhaaranayaan si keli keli ah.
2. Xubanaha Ciidanka HSNQ waa in ay dhaarta u maraan qaabka soo socda: "Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan daacad u noqdo Qaranka, Dastuurka dalka, sharciga HSNQ iyo shuruucda kale ee dalka, una hoggaansamo amarrada madaxda sare, dhawrana sirta Qaranka".

### Qodobka 4aad
### Qaadashada ama Qorista Xubno Cusub

1. Qorista xubnaha cusub ee HSNQ waxaa loo qaadanayaa si waafaqsan Qodobbada 17, 18 iyo 19 ee Sharciga Hay'adda HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.
2. Xubinnimada HSNQ lama soo doonto, lagamana soo ergeeyo, ee xubnaha cusub waxaa lagu qaataa qaab xulasho ah iyo habraac gooni ah oo ku salaysan qorshe iyo baahi gaar ah oo ay Hay'addu qabto oo keli ah, baahidaasna waxaa xadidaya ama jaan-goynaya Taliyaha Hay'adda ama ciddii kale ee uu u wakiisho.

3. Looma qaadan karo xubinnimada Hay'adda qof aan baahi shaqo loo qabin, xuquuqdiisana lagu soo darin miisaaniyadda Hay'adda ama aan loo hayn qaab kale oo lagu dabooli karo xuquuqdiisa.
4. Qof kasta oo ku soo biiraya ciidanka HSNQ, waxaa la marsiinayaa baaris amni, caafimaad iyo mid maandooriye, qofkii laga helo mid ka mid ah cudurrada faafa ama cudur aan u suuragalin karin gudashada waajibaadka laga rabo, kama mid noqonayo HSNQ.
5. Ciidanka horey uga mid noqdey HSNQ; arrimaha la xiriira baaristooda caafimaad waxaa loo raacayaa habraaca baarista caafimaadka ee Hay'adda.
6. Guud ahaan, habka loo qorayo iyo sida loo hubinayo shuruudaha laga doonayo qof kasta oo ka mid noqonaya ciidanka HSNQ; waxaa loo raacayaa si waafaqsan Xeer-hoosaadka Hay'adda.

## Qodobka 5aad
## Waajibaadka Shaqo ee Ciidanka

1. Xubnaha ciidanka HSNQ oo dhan, waxaa waajib ku ah in ay qabtaan hawlaha loo xilsaaray ayana fuliyaan amarrada sharciga ah ee ay siiyaan madaxda ka sarraysa iyo madaxda kale ee awoodda u leh.
2. Xubanaha Ciidanku, waxay si joogto ah u gudanayaan shaqada loo idmaday, waxaana loo diri karaa meel kasta waqti kasta, si ay u fuliyaan shaqo loo idmaday.
3. Ciidanka HSNQ waxay qabanayaan hawlaha la xariira sugidda amniga iyo xasilloonida amniga qaranka, iyagoo raacaya tilmaamaha iyo farriimaha ay madaxdu siiyaan.
4. Taliyeyaasha ciidanka HSNQ, waxay xiriir wada shaqayn oo wanaagsan la yeelanayaan madaxda ciidammada kale, hay'adaha amniga iyo cadaaladda markii loo baahdaba.
5. Si loo xaqiijiyo ujeeddadii loo abuurey ciidanka HSNQ, askari kasta waa inuu ka marnaadaa naf-jecleysi, waana inuu ku tilmaamnaadaa dhaqan-wanaag iyo hufnaan.
6. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah inuu aqoonsado magaca iyo sharafta cutubkiisa, waana inuu ka fogaado tallaabo iyo eray kasta oo hoos u dhigi kara magaca iyo sharafta cutubkiisa, isla

markaana inta tabartiisa iyo kartidiisa ah waa inuu ku dadaalo inuu kor u qaado magacaas.

7. Haddii xubin ka tirsan ciidanka uusan ku dhaqmin anshax wanaag iyo sharaf, waa in madaxdiisu ka qaado tallaabo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 6aad
## Amar Ciidan

Dhammaan waajibaadka Ciidanka HSNQ waxaa saldhig u ah oo ay ka unkamaan amar, oo ah dhidibka jiritaanka ciidannimo, wuxuuna ku dhisan yahay ismaqal iyo kala-sarrayn, sidaasi darteed, xubin kasta oo ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah qaadashada amarrada madaxdiisa goor kasta iyo meel kastaba.

## Qodobka 7aad
## Asaluub (Dishibiliin) Ciidan

1. Asluubta ama dishibiliinka ciidannimo waa mid ka mid ah tiirarka ugu weyn ee hab-dhaqanka, xeerka askarnimo iyo waajibka koowaad ee askari iyo sarkaal kasta laga rabo, derejo kasta ha lahaadee.
2. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah inuu noqdo tusaale looga dayan karo dhaqan-wanaagga mar kasta iyo goob kasta, iyo ilaalinta anshaxa iyo xeerarka ciidannimo.

## Qodobka 8aad
## Nadaafadda Qof Ahaaneed

1. Qof kasta oo ciidanka HSNQ ka tirsan waa inuu ku sugnaado heerka ugu sarreeya ee nadaafadda, waana inuu si joogto ah isku daryeelo isla markaana uu ku dadaalo nadaafadda jirkiisa iyo dirayskiisa (labbiskiisa).
2. Ciidanka labbisan ee HSNQ waxay la bixi karaan timo xannaanaysan oo ku habboon.
3. Waxaa la samaynayaa kormeer iyo fatashaad joogto ah si loo hubiyo in la raacay hababka nadaafadda qofeed iyo xaruneed, waana la anshax-marinayaa ciddii ku xadgudubta.

## Qodobka 9aad
## Kala-sarreynta Ciidanka

1. Kala-sarreyntu waa u hogaansanaanta derejaba derejada ay ka sarreyso iyo ilaalinta waajibaadka ka dhalanaya, waajibka ugu horeeya ee kala-sarreyntuna waa ismaqal ka dhaxeeya loo-taliyaha iyo madaxdiisa marka shaqo dhex timaado, isla markaana ismaqalku waa inuu noqdaa deg-deg, is-xushmayn iyo mid aan kala dhinayn.
2. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ waa inuu u hogaansanaadaa, xaq-dhowraa madaxdiisa iyo madaxda kale ee ciidamada kale ka tirsan iyo sidoo kale madaxda rayidka ah ee Qaranka.
3. Xubintii u hoggaansami waaya amar sharci ah oo madaxda ka sarreysa siisay, waxaa la marsiinayaa xeerka anshaxa Hay'adda.
4. Dhammaan Ciidanka HSNQ waxaa waajib ku ah in ay dhowraan ilaaliyaanna kala-sarreynta talinta iyo kala-sarreynta ciidannimo.

## Qodobka 10aad
## Derejada Ciidanka HSNQ

1. Derejooyinka Ciidanka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranku waxay u kala horreeyaan sida hoos ku xusan:

**1) Dabley:**
   a) Layli Dable (L/D/le);
   b) Dable (D/le); iyo
   c) Alifle (A/le).

**2) Saraakiil-xigeen:**
   a) Layli Sarkaal (L/Sarkaal);
   b) Labo Alifle (L/A/le); iyo
   c) Saddex Alifle (S/A/le).

**3) Kormeereyaal:**
   a) Kormeere Koowaad;
   b) Kormeere Labaad; iyo
   c) Kormeere Saddexaad.

**4) Saraakiil hoose:**
   a) Xidigle (X/le);
   b) Labo Xidigle (L/X/le); iyo

c) Dhamme/Kabtan.

**5) Saraakiil sare:**

a) Gaashaanle (G/le);
b) Gaashaanle Dhexe (G/dhexe); iyo
c) Gaashaanle sare (G/sare).

**6) Sarreeyeyaal:**

a) Sarreeye Guuto (S/Guuto).
b) Sarreeye Gaas (S/Gaas); iyo
c) Sarreeye Guud (S/Guud).

2. Derejada ciidannimo waa xaq uu leeyahay xubinta ciidanka ah, waxa uuna ku lumin karaa oo keli ah, haddii looga xayuubiyo (qaado) si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 11aad
## Dallacaadda Ciidanka HSNQ

1. Dallacsiinta Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa lagu salaynayaa ku-talo-galka miisaaniyad-sanadeedka ciidanka.
2. Dallacaadda Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa lagu bixinayaa; u bislaansho khibradeed ama aqooneed ama kartiyeed.
3. Muddada u bislaanshaha dallacaadda ee saraakiisha min derejo ilaa derejo waa sidasoo socoto:
    a) Xiddigle ilaa Labo Xiddigle, waa muddo dhan 2 (labo) sano;
    b) Labo Xiddigle ilaa Dhamme, waa muddo dhan 3 (saddex) sano;
    c) Dhamme ilaa Gaashaanle, waa muddo dhan 4 (afar) sano;
    d) Gaashaanle ilaa Gaashaanle Dhexe, waa muddo dhan 4 (afar) sano;
    e) Gaashaanle Dhexe ilaa Gaashaanle Sare, waa muddo dhan 5 (shan) sano;
    f) Gaashaanle Sare ilaa Sarreeye Guuto, waxay ku xiran tahay mudnaan iyodhismaha tirada ciidanka HSNQ;
    g) Sarreeye Guuto ilaa Sarreeye Gaas, waxay ku xiran tahay mudnaan iyo dhismaha tirada ciidanka; iyo
    h) Sarreeye Gaas ilaa Sarreeye Guud, waxay ku xiran tahay mudnaan iyo dhismaha tirada ciidanka.

4. Dallacaadda askarta waxaa soo jeedinaya xafiiska ciidanka asagoo raacaya xeer-hoosaadka Hay'adda ee khuseeya arrimaha dallacaadda, Talaiyaha Hay'adda ayaana wareegto ku soo saaraya.
5. Dallacaadda saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada waxaa soo diyaarinaya xafiiska ciidanka asagoo tixraacaya buuxsamidda shuruudaha dallacaadda, kadibna Taliyaha Hay'adda ayaa maxdaxweynaha u soo jeedinaya oo xeer ku soo saaraya.
6. Saraakiisha mudanayaasha ah ee ka tirsan HSNQ, isla markaana aan marna derejo qaadan; waxaa loo tixgalinayaa, loona qiimaynayaa khibraddooda iyo shahaadadooda waxbarasho.
7. Dallacaadda Xubnaha Ciidanka iyo dhammaan arrimaha kale ee la xiriira waxaa loo maareynayaa si waafaqsan Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan, ka dib markii uu dhaqan-gal noqdo.
8. Xeer-hoosaadka Hay'adda ayaa lagu qeexayaa habraaca iyo shuruudaha dallacaadda ciidanka iyo xubnaha HSNQ.

## Qodobka 12aad
## Faafinta Derejada Iyo Dallacaadda

Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee si sharciga waafaqsan loo siiyo derejo ama loo dallacsiiyo; waxaa loo galinayaa faafinta HSNQ.

## Qodobka 13aad
## Sheegashada Derejo Been ah

Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee si sharci darro ah u sheegta derejo ama billad ciidan oo uusan lahayn ama been abuura wareegto derejo-siin ah ama wax ka bedela dhammaanteed ama qeyb ka mid ah; waxa uu ku dhacay faldembiyeed, waxaana loo ciqaabayaa si waafaqsan sharciga Hay'adda iyo Xeerarka Ciqaabta Ciidammada.

## Qodobka 14aad
## Tababarrada Ciidanka HSNQ

1. Ciidanka HSNQ wuxuu yeelanayaa xarumo tababbar oo dabooli kara

baahida tababbarrada ciidanka.

2. Tirada iyo tayada xarumaha tababbarrada waxaa jaan-goynaya Taliyaha HSNQ, iyadoo laga ambaqaadayo miisaaniyad sanadeedka HSNQ.
3. Manhajka tababbarka ciidanka HSNQ waxaa dejinaya Hoggaanka Tababarrada, iyadoo lagu salaynayo baahida shaqo ee ciidanka, waxaana fulinaya xarumaha tababbarrada ciidanka.
4. Si gaar ah, ciidanka u xilsaaran amniga xarumaha muhiimka ah iyo ilaalada gaarka ah, waxaa si joogto ah loogu tababarayaa xirfadaha iyo agabka casriga ah ee lama huraanka u ah waajib gudashadooda, si waafaqsan Qodobka 7aad (11) ee Xeerka Amniga iyo Bad-qabka Xarumaha Dawladda.

## Qodobka 15aad
## Labbiska (Dirayska) Ciidanka

1. Haddii aan si kale loo sheegin, xubnaha Ciidanka HSNQ waxay xiranayaan marka ay shaqada ku jiraan labiska u cayiman, waxayna sidan karaan hub iyo rasaas waqtiga, meesha iyo sida loo amray.
2. Haddii qof ka tirsan ciidanka HSNQ loo oggolaado inuu xirto dharka rayidka waxaa ka reebban inuu la xirto qeyb ka mid ah diraysa ciidanka.
3. Ciidanka HSNQ xaaladaha loo oggolaaday xirashada dharka rayidka waxaa qabanaya Xeerka Asluubta (Dishibiliinka) Ciidanka, xataa markii ay ciidanku xiranyihiin dharka rayidka waa in ay u hoggaansamaan, xushmeeyaan, ayna salaamaan taliyeyaashooda iyo madaxda kale.
4. Xubnaha Ciidanka Hay'adda waa inay markasta hubiyaan nadaafadda labiskooda iyo in qalabka ciidan ee ay qaadanayaan uu yahay mid shaqaynaya oo aan cillad lahayn.
5. Xubintii ku guuldarreysata inay fuliso arrimaha ku xusan qodobkan, waxay mutaysanaysaa anshax-marin si waafaqsan Xeerka Anshaxa Hay'adda.

## Qodobka 16aad
## Hubka iyo Agabka Ciidanka

1. Xubin kasta oo ciidanka Hay'adda ka tirsan, hubka iyo agabka ciidan ee uu ku shaqaynayo waxuu noqonayaa mid ay Hay'addu bixisay oo ay dawladdu leedahay.

2. Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa ka reebban inay isticmaalaan qalab ciidan oo si gaar ah loo leeyahay marka ay ku jiraan shaqada loo idmaday.
3. Gaadiidka, hubka iyo dhammaan qalabka ciidan ee soo gala gacanta Hay'adda ee wali si fiican u shaqaynaya, isla markaana uu qof si shakhsi ah u leeyahay; Hay'adda ayaa la wareegaysa, wuxuuna noqonayaa hanti dawladeed, qofkii lahaana waa loo qiimaynayaa, haddiise hubku yahay mid cilladaysan ama hawlgab ah waa la baabi'inayaa.

## Qodobka 17aad
## Hoggaansanaanta Ciidanka

Waajibka ugu weyn ee ciidanku waa u hoggaansanaanta amarrada ciidan ee sida sharciga waafaqsan u soo fula, iyadoo loo gudanayo si Degdeg ah, si xushmad leh iyo si buuxda, sidaas darteed, lootaliyuhu waa inuu qaataa amarrada madaxdiisa, isagoo waxba ula kala harin tabartiisa iyo kartidiisaba.

## Qodobka 18aad
## Qaadasho Tallaabo Degdeg ah

1. Haddii qof Taliye ama Madax ah ay ku timaado ama la soo gudboonaato arrin degdeg ah oo uusan haysan amar ku aaddan, uuna u baahdo wax ka qabasho degdeg ah, isla markaana aan joogin meel uu ka weydiisan karo ama lagu siin karo amar ama aan fulin karin amar la siiyey xaaladda oo isbeddeshay awgeed; wuxuu qaadan karaa tallaabo degdeg ah oo waafaqsan xaaladda markaas taagan.
2. Xubbinta tallaabada degdegga ah qaadday si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, waa inay sida ugu dhaqsiyaha badan oo suuragal ah, oo aan ka badnayn toban iyo labo (12) saac gudahood, warbixinta tallaabada uu qaaday iyo sababta degdegga ka dhigtayba, ugu soo gudbiyaa madaxda ka sarraysa.

## Qodobka 19aad
## Adeegsiga Garaadaha Ciidanka

Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan, waa inuu garawsadaa ujeeddada garaadaha iyo amarka inay tahay inuu u adeegsado oo keli ah shaqada gudaheeda iyo danta ciidannimo.

## Qodobka 20aad
## Bedelka iyo Eregta

1. Taliyaha HSNQ ayaaa bedeli kara Askarta Ciidanka HSNQ, isagoo tixgelinaya baahida shaqada iyo duruufaha gaarka ah ee xubin kasta, wuxuu sidoo kale oggolaan karaa askarta laga soo bedelayo ciidammada kale ee dawladda loona soo bedelayo ciidanka HSNQ.
2. Taliyaha ayaa sidoo kale, oggolaan kara eregta saraakiisha ka tirsan ciidanka HSNQ, markii ay soo codsato hay'ad dawladeed ama mas'uul ka tirsan dawladda.
3. Xubinta ku shaqeysa ereg ahaanta, waxay la mid tahay xubnaha kale ee haya shaqada Ciidanka HSNQ.

## Qodobka 21aad
## Waxyaabaha ka Reebban Ciidanka HSNQ

1. Xubnaha Ciidanka HSNQ, waxaa ka reebban inay qabtaan shaqo ka baxsan shaqada ciidanka ama shaqo kasta oo ka horimaanaysa tii loo xilsaaray ama loogu talagalay.
2. Qof kasta oo ciidanka HSNQ ka tirsan waxaa ka reebban ka mid noqoshada ururro siyaasadeed ama ururro qarsoodi ah.
3. Xubnaha Ciidanka HSNQ waxaa sidoo kale, ka reebban inay abaabulaan ama ay qeyb ka noqdaan bannaanbaxyo.
4. Xubnaha ciidanka Hay'adda waxaa ka reebban -haddii aysan helin oggolaansho- inay bixiyaan xog ama ay baraha bulshada ku faafiyaan arrimo shaqada Hay'adda khuseeya ama xambaarsan aragti siyaasadeed.
5. Xubnaha Hay'adda waxaa ka reebban inay aqbalaan ama qaataan hadiyad, manaafacaad ama wax faa'iido ah oo ka yimid shaqsiyaad, shirkado ama ururro xiriir shaqo la leh hawlaha Hay'adda.

## Qodobka 22aad
## Bandhig Codsi ama Cabasho iyo Habka Gudbinta

1. Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan, doonayana inuu soo bandhigto ama uu arrin la wadaago madaxda, waa inuu soo maraa heerarka talinta.

2. Qofkii madaxda u soo gudbiya codsi ama cabasho baalmarsan heerarka talinta; wuxuu ku dhacayaa gef asluubeed.
3. Dacwad kasta ama cabasho kasta waa inay ahaataa mid qof keli ah keensaday, waxaana reebban in si wadar ah loo soo gudbiyo.
4. Qof kasta oo Ciidanka HSNQ ka tirsan ee doonaya inuu cabasho ku soo hagaajiyo Taliye Cutub ama qof madax ah; waa inay ahaataa mid qoran, waana inay saxiixaan madaxda dhexe ee ay tahay in ay soo marto.
5. Qof madax ah ma diidi karo inuu xubinta cabashada qabta u saxiixo iyo inuu u gudbiyo madaxda ka sarraysa ee awoodda u leh cabasho uu soo qortay mid ka mid ah loo-taliyeyaashiisu, isla markaana, waa inuu raaciyaa aragtidiisa ama faalladiisa.

## Qodobka 23aad
## Ilaalinta Sirta iyo Agabka Ciidanka

1. Ciidanka HSNQ, waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo xifdinta wax kasta oo sir ciidan ah, isla markaana, waxaa ka reebban faafinta w副rarka iyo xogta ciidanka.
2. Sidoo kale, waa in ciidamadu si wanaagsan u xanaaneeyaan una daryeelaan hubka, agabka iyo alaabaha kale ee lagu aaminey.

## Qodobka 24aad
## Xilka iyo Mas’uuliyadda Ciidanka HSNQ

Markii laga soo tago mas’uuliyadda iyo waajibaadka ay ciidamada qalabka sida si guud ugu wada idman yihiin; Ciidanka HSNQ, waxay si gooni ah ugu xilsaaran yihiin inay soo gudbiyaan wixii xog ah oo ay helaan, si ay uga qeyb qaadato raadinta, xuuraaminta xogaha iyo wararka xaqiiqda ah, saadaalinta iyo dabagalka waxyaabaha waxtarka u leh sugidda amniga iyo xasilloonida amniga qaranka, la socoshada dhaqdhaqaaqyada cadawga, burburinta iyo ka hortagga shirqoollada iyo danaha cadawga dibadda iyo gudaha dalka IWM.

## Qodobka 25aad
## Dhowrista Dastuurka iyo Sharciyada Dalka

Ciidanka HSNQ, ka sokow inay u hogaansamaan ayna ilaaliyaan xeerarka iyo anshaxa ciidamada u degsan, waxaa saaran:

1) Inay dhawraan daacadna u noqdaan isla markaana ay difaacaan una hiiliyaan;
   B. Dastuurka dalka.
   T. Sarreynta sharciga iyo mabaadi'da asaasiga ah ee dawladnimada.
   J. Ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo xuquuqda asaasiga ah, si waafaqsan qodobka 127aad faqradiisa (1) xarfaha (A, B iyo C) ee Dastuurka KG.
2) Inay ka dhawrasadaan ku-milmidda siyaasadda isla markaana ay dhexdhexaad ka noqdaan arrimaha siyaasadda, si waafaqsan Qodobka 127aad faqradiisa (1) xarfka (E) ee Dastuurka KMG.
3) Dhanka kale, waxaa waajib ku ah oo saaran taliyeyaasha iyo madaxda ciidanka inay ciidamada ku tababaraan kuna wacyigeliyaan; dhaqangelinta dastuurka, sharciyada dalka ee kale iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaliya qeybta ka tahay, si waafaqsan 127 faqradiisa (1) xarfka (F) ee Dastuurka KG.
4) Sidoo kale, taliyeyaasha iyo madaxda Ciidanka HSNQ waa inay hubiyaan in xeerarka ciidamada iyo sharciyada kale ee dalka la dhawray laguna dhaqmey meelkasta iyo goorkastaba.

# CUTUBKA SADDEXAAD
# SHAQADA IYO AWOODAHA HSNQ

## Qodobka 26aad
## Xiriirka Arrimaha Dibadda

1. Iyadoo laga ambaqaadayo guud ahaan, ilaalinta danaha qaranka, gaar ahaan xaaladaha iyo dhacdooyinka waxtarka u leh ama liddiga ku ah amniga iyo xasilloonida qaranka, dalka gudihiisa iyo dibaddiisa; xiriirka arrimaha dibadda ee HSNQ wuxuu ku salaysnaanayaa hagaajinta iyo horumarinta xiriirradii horay u jiray iyo abuurista xiriirro cusub oo u adeegaya danaha amniga qaranka.
2. Istiraatiijiyadda iyo qorshaha xiriirka dibadda ee HSNQ waxaa jihaynaya Agaasimaha Guud (Taliyaha) HSNQ.
3. Taliyaha HSNQ wuxuu Madaxweynaha JFS la socodsiiyaa dhammaan xiriirrada iyo dhaqadhaqaaqyada waxtarka weyn u leh amniga iyo xasilloonida qaranka iyo dhammaan tallaabooyinka la qaaday si loo baajiyo khataro ku wajahan ama ku soo fool-leh amniga iyo xasilloonida Qaranka.

## Qodobka 27aad
## Wakiillada Hay’adda ee Dibadda

1. Hay’addu waxay ku yeelanaysaa dhammaan safaaradaha ay JFS ku leedahay dalalka kale, xil joogta ah oo ah **La-taliyaha** kowaad ee safaaradda ahna ku-xigeenka danjiraha, xilkaas oo ku xusan Qodobka 8aad, faqradiisa (1), xarafka (b) ee Sharciga Arrimaha Dibadda.
2. Wakiillada Hay’adda ee dibadda waxay u xilsaaran yihiin waajibaadka hoos ku xusan:
    a) Waxay u xilsaaran yihiin **waajibaadka La-taliyaha** danjiraha ee ku xusan Qodobka 5aad ee sharciga arrimaha dibadda;
    b) Wakiillada Hay’addu waxay si gaar ah ugu xilsaaran yihiin wakiilna Hay’adda uga yihiin; xuuraansiga arrimaha amniga iyo xasilloonida qaranka taabanaya ama waxtarka u leh ee dalalka ay joogaan iyo abuuridda, adkaynta iyo horumarinta iskaashiga, wax wada-qabsiga

iyo xog is-dhaafsiga iyo xiriirka HSNQ kala dhaxeeya Hay'adaha dhiggeeda ah.

3. Wakiillada Hay'adda waxay yeelanayaan derejada iyo mudanaanta ku xusan Qodabada 8, 9 iyo 13 ee sharciga arrimaha dibadda waxayna u madaxbannaan yihiin gudashada waajibaadkooda shaqo, si waafaqsan Qodobka 10aad ee isla sharciga kor ku xusan.
4. Qofka loo magacaabayo xilka faqrada 1aad ee Qodobkan ku xusan waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:
   a) Waa inuu haystaa ugu yaraan shahaado jaamacadeed oo ay bixisay jaamacad la aqoonsan yahay;
   b) Waa inuu leeyahay waayo-aragnimo shaqo oo aan ka yarayn shan (5) sano lana xariirta hawlaha Hay'adda ama arrimaha diblomaasiyadda.
5. Taliyaha Hay'adda ayaa soo xulaya wakiillada Hay'adda ee dibadda, ka dibna wuxuu u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha oo asana dhankiisa u sii gudbinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda si uu xilka ugu magacaabo.
6. Magacaabista wakiillada Hay'adda kadib, Hay'addu waxay ku wargelinaysaa Hay'adaha dhiggeeda ah ee dalalka wakiillada loo magacaabay.

## Qodobka 28aad

## Ku Meelaynta Xubnaha Hay'adda Laamaha Kale ee Dawladda

1. HSNQ waxay xubnaheeda qaar ka mid ah ku meelayn kartaa wasaaradaha, wakaaladaha iyo laamaha kala duwan ee dawladda, hay'adaha dawladda waa inay oggolaadaan meeleyntaas si dahsoon ama si daahfuran tii ay noqotaba, si waafaqsan qorshaho-hawleedka Hay'adda iyo siyaasadda guud ee amniga qaranka.
2. Xubnaha ka tirsan HSNQ ee lagu meeleeyo laamaha kale ee Dawladda; waxay xogaha la soo wadaagayaan xafiiska ay ka tirsan yihiin ama cidii kale ee loo cayimo.
3. Xubnaha ku meelaysan laamaha kale ee dawladda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan; haddii hay'adaha ay ku meelaysan yihiin ka qaataan gunno; waxay xaq u yeelanayaan mushaarka ay Hay'adda ku lahaayeen.
4. Xubnaha ku meelaysan laamaha kale ee dawladda waxaa qabanaya sharciga iyo xeerarka HSNQ.

## Qodobka 29aad
## Amniga Xarumaha Dawladda

1. HSNQ iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda shaqo, waxay amniga xarumaheeda iyo xarumaha kale ee ay amnigooda u xilsaaran tahayba u sugaysaa si waafaqsan Qodobada **Xeerka Amniga iyo Badqabka Xarumaha Dawladda** iyo Habraacyada amniga ee HSNQ.
2. Dhammaan xarumaha dawladda waxaa ka hawlgelaya xubno ka tirsan HSNQ oo ay shaqadoodu noqoneyso aruurinta xogaha daahsoon ee khuseeya amniga iyo dhaqdhaqaaqa xarumaha iyo ku gacan-siinta boliiska gudashada waajibaadkooda, si waafaqsan Qodobka 5aad, faqradiisa (3) ee Xeerka Amniga iyo Badqabka Xarumaha Dawladda.
3. Hay'addu waa inay nuqullo ka haysato MAP-ka xarumaha Dawladda ee muhiimka ah oo si dhamaystiran u muujinaya marinada, iridaha, dhismaha gudaha, jaranjarooyinka, iridaha danbe, xeyndaabka guud iyo wax kasta oo aan looga maarmin gurmadka iyo hawlgallada amni, si waafaqsan Qodobka 9aad, faqradaha (7) iyo (8) ee Xeerka Amniga iyo Bad-qadbka Xarumaha Dawladda.

## Qodobka 30aad
## Maamulka iyo Jiheynta Amniga Hoteellada iyo Goobaha Ganacsiga

HSNQ ayaa masuul ka ah qiimaynta, la socodka, baarista iyo jiheynta hawlaha sugidda amniga hoteellada, goobaha ganacsiga iyo xarumaha adeegga bulshada, si waafaqsan Qodobada **Xeerka Amniga Hoteelada, Goobaha Ganacsiga iyo Xarumaha Adeegga Bulshada**, gaar ahaan, Qodobka 5aad, faqradaha (5-12) iyo Qodobka 10aad, faqradda (7).

## Qodobka 31aad
## Daryeelka Xubnaha Hay'adda

1. Guud ahaan, xubnaha HSNQ waxay yeelanayaan daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah, gaar ahaan xubnaha ciidanka ee ku dhaawacma ama ku waxyeelooba hawlgallada iyo shaqada joogtada ah ee HSNQ waana inay helaan daryeel caafimaad oo dhammaystiran, si waafaqsan XH-HSNQ.

2. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee geeriyoota iyadoo ku jirta hawlgal ama gudanaysa waajibaadkeeda shaqo; ehelladeedu waxay xaq u yeelanayaan:
   a) In duug samir-siin ah la siiyo;
   b) In la siiyo saldhigga mushaarkiisa;
   c) Ehellada xaqa sare ku xusan yeelan kara waa: caruurtiisa iyo xaaskiisa haddii ay jiraan, haddii kalana labadiisa waalid oo keli ah;
   d) Xubin kasta oo la xaqiijiyay inuu geeriyooday asagoo ku jira hawl baalmarsan sharciga iyo shaqada HSNQ; xuquuqda qodobkan ku xusan ma yeelanayo.

## Qodobka 32aad
## Adeegyada Gurmadka Degdegga Ah

Hay'addu waxay yeelanaysaa keyd caafimaad oo ku filan gargaarka degdegga ah, gaadiidka gurmadka degdegga ee caafimaadka iyo dabdamisyo u gaar ah iyo shaqaale u tababaran gargaarka degdegga ah oo si joogto ah u hawlgala, si waafaqsan Qodobka 9aad, faqradaha (1) iyo (2) ee Xeerka Amniga Xarumaha Dawladda.

## Qodobka 33aad
## Qaadashada Aqoonsiyo Kala Duwan

1. Xubnaha HSNQ waxay adeegsan karaan magacyo, aqoonsiyo iyo baasaboorro kala duwan xilliyada ay gudanayaan waajibaadkooda shaqo, ka dib oggolaanshaha AG ee Hay'adda.
2. Xubinta ka tirsan Hay'adda ama dan shaqo kala dhaxeyso ee AG ee HSNQ u arko in la siiyo baasaboor diblomaasi ah baahi shaqo darteed ama xeer-hoosaadka Hay'addu tilmaamo, waa la siinayaa, waxuuna yeelanayaa xasaanadda iyo habmaamuuska diblomaasiyiinta mid la mid ah.
3. Hannaanka bixinta baasaboorka diblomaasiga ah iyo Xubnaha loo oggolaan karo; waxaa loo raacayaa XH-HSNQ.

## Qodobka 34aad
## Barnaamijyada ku Mataaneysan HSNQ

1. Waxaa jiraya barnaamijyo qaran oo ku mataaneysan HSNQ, isla markaana hoos imaanaya AG ee HSNQ, waxaase si toos ah u maamulaya agaasime u gaar barnaamij qaran ee kasta.
2. Barnaamijyada qaran ee ku mataaneysan HSNQ waxaa ka mid ah:
   a) **Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga:** oo ah hay'ad tacliin sare oo takhasusi ah, una gaar ah tacliinta sare, tababarrada, iyo cilmibaarista khuseysa amniga;
   b) **Xarunta Irshaad ee ka hortagga xag-jirnimada:** oo ah xarun u xilsaaran daraasaadka, wacyigelinta iyo barnaamijyada ka hortagga arrimaha la xiriira afkaarta argagixisada;
   c) **Madbacadda Amniga Qaranka:** oo ah barnaamij qaran oo u xilsaaran daabicidda ama soosaaridda buugta, aqoonsiyada, qoraallada iyo dhammaan xogaha loo diyaariyay hab cilmiyaysan, isla markaana muudnaanta iyo hortabinta u leh Qaranka Soomaaliyeed;
   d) **Xarunta Qaranka ee Kaydinta Xogaha:** oo ah xarun lagu kulmiyo, lagu keydiyo, lagu ilaaliyo, lagana maareeyo xogaha qaranka;
   e) Mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada qaran ee faqraddan ku xusan wuxuu yeelanayaa Xeer-nidaamiye u gaar ah.
3. Barnaamijyada qaran ee ku xusan Qodobkan waxay yeelanayaan madax miisaaniyadeed gooni ah oo ka mid ah miisaaniyadda HSNQ.

## Qodobka 35aad
## Hubinta Ajaanibta

1. HSNQ waxay hubin amni ku samaynaysaa lana soconaysaa shaqada iyo shaqaalaha hay'adaha iyo shirkadaha ajnabiga ah, waxay sidoo kale, hubin amni ku samaynaysaa Ajaanibta qaadanaya dal-ku-galka, deganaashaha, iyo jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Qodobka 8aad, faqradihiisa (11) iyo (12) ee Sharciga HSNQ;
2. Qof Ajanabi ah oo aan la marsiin hubinta amni ee Hay'adda lama siin karo dal-ku-gal, deganaasho iyo jinsiyad midna;
3. Hay'addu waxay martida sida gaarka ah ugu socota ama ay maamuleyso siin kartaa mudnaan iyo maamuus gooni ah oo daahsoon.

## Qodobka 36aad

## Kaaliyaha Noqonaya Sii-hayaha ama Ku-simaha Xilka AG

1. Markii uu bannaanaado sabab ay ahaataba xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud ee HSNQ, si waafaqsan Qodobka 14aad, faqradiisa (2) ee Sharciga HSNQ; Kaaliyaha sii-hayaha noqonaya waxaa go'aaminaya Golaha Wasiirrada JFS.
2. Kaaliyaha sii-haye u noqda si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa ka reebban dhammaan arrimaha ku xusan Qodobka 13 ee sharciga HSNQ, waxaana saaran inuu xilka u wareejiyo si waafaqsan Qodobka 43aad, faqraddiisa (4).
3. Markii Taliyaha Hay'addu dalka dibaddisa aadayo, wuxuu ku-sime ka dhigan karaa mid ka mid ah Kaaliyeyaashiisa.
4. Taliyaha Hay'adda waxaa u furan inuu qaar awoodihiisa ka mid ah, si joogta ah ama si ku-meelgaar ah, ugu xilsaarto kaaliyaashiisa ama saraakiisha kale ee Hay'adda, si waafaqsan Qodobka 12aad (9) ee Sharciga HSNQ.

# CUTUBKA AFARAAD
# NIDAAMKA XARUMAHA BAARISTA HSNQ

### Qodobka 37aad
### Hannaanka Baarista Dembiyada

1. Hannaanka baarista dembiyada HSNQ waxaa la waafajinayaa Qodobka 35aad ee Dastuurka KMG, Qodobbada Sharciga HSNQ, Sharciga La-dagaallanka Argagixisada iyo Xeer-nidaamiyahan.
2. Arrimaha khuseeya nidaamka xabsiyada iyo maareynta maxaabiista HSNQ ee aan laga helin sharciyada iyo xeerarka faqradda sare ku xusan waxaa loogu noqonayaa Qodobbada ka khuseeya Xeerka Xabsiyada iyo Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.
3. Baarista Hay'adda waxaa loo dhammeystirayaa dhammaan agabka iyo wadiiqooyinka casriga ah ee fududayn kara helidda caddaymaha dembiga iyo dembiilaha.
4. Habka maamulka iyo maaraynta kiisaska iyo maxaabiista iyo guud ahaan Faahfaahinta nidaamka baarista dembiyada HSNQ; waxaa loo raacayaa si waafaqsan Habraaca Baarista Dembiyada ee HSNQ.

### Qodobka 38aad
### Mas'uuliyadda Taliyaha Baarista

1. Taliyaha baarista HSNQ isagoo ka wakiil ah Taliyaha Guud ee HSNQ; wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda, si waafaqsan xeerka:
    a) ilaalinta iyo dhaqangelinta xeerarka iyo habraacyada arrimaha khuseeya xarumaha baarista Hay'adda, maxaabiista iyo nidaamka baarista.
    b) Maamulka iyo maaraynta dhammaan xarumaha baarista HSNQ ee maxaabiista lagu hayo, xarumahaas oo ku xusan Qodobka 49aad ee sharciga HSNQ.
    c) Bad-qabka iyo xifdinta hantida, agabka iyo dhammaan qalabka loogu talagalay in loo adeegsado danaha baarista ama dembi lagu galay ama ay maxaabiistu leeyihiin.

   d) Ka hortagga wax allaale wixii halis gelin kara daryeelka iyo caafimaadka maxaabiista.
2. Taliyaha baarista HSNQ wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad u dhiganta tan Taliyaha guud ee ilaalada xabsiyada dalka, si waafaqsan Xeerka Xabsiyada iyo Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.

## Qodobka 39aad
## Ciidanka Ilaalada Xarumaha Baarista

1. Xarumaha baarista HSNQ waxaa ka hawlgelaya ciidan ka tirsan HSNQ oo si gaar ah ugu xilsaaran maaraynta goobaha dembiyada aragagixisadu ka dhacaan iyo ilaalinta xarumaha baarista HSNQ.
2. Xubnaha ciidanka HSNQ ee u xilsaaran ilaalada xarumaha baarista Hay'adda, maxaabiista iyo nidaamkooda; waxay yeelanayaan awoodaha iyo waajibaadka ay leeyihiin xubnaha ilaalada xabsiyada dalka oo kale, ee ku xusan Xeerka Xabsiyada iyo Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.
3. Ciidanka ilaalada ee ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, marka ay gudanayaan waajibaadkooda ku aaddan ilaalada xarumaha baarista, maxaabiista Hay'adda iyo maaraynta goobaha dembiyada; waxay hoos tagayaan kuna shaqaynayaan amarrada, jihaynta iyo farriimaha Taliyaha baarista Hay'adda,

## Qodobka 40aad
## Mas'uuliyadda Xeer-ilaalinta Guud ee CQS

Xeer-ilaaliyaha guud ee CQS iyo wakiilladiisu, waxay xarumaha baarista HSNQ u kormeeri karaan si waafaqsan Qodobka 37aad, faqradiisa (8) ee Sharciga HSNQ.

## Qodobka 41aad
## Booqashada iyo Kormeerka Taliyaha Hay'adda

Taliyaha HSNQ wuxuu si shakhsi ah -ugu yaraan sanadkiiba mar- booqasho iyo kormeer ku samaynayaa dhammaan xarumaha baarista HSNQ ee dadka lagu hayo, si uu ugu kuurgalo una ogaado xaaladaha iyo baahiyaha dhabta ah ee ka jira xarumaha baarista ama ay maxaabiistu qabaan, isla markaana uu qaado tallaabada ku habboon.

## Qodobka 42aad
## Kala Saaridda Xabsiyada iyo Maxaabiista

Si looga baaqsado ama looga hortago intii suuragal ah halista ka dhalan karta in maxaabiistu isku gudbiso afkaar ama anshax aan wanaagsanayn, loona hirgeliyo dhaqanka wanaagsan iyo daryeelka nabadgelyada, waxaa maxaabiista loo kala saarayaa sida soo socota:

1) Maxaabiista loo soo xiray tuhun argagixiso ama loo haysto dembiyada ku xusan Sharciga La-dagaallanka Argagixisada; waxaa lagu haynayaa meel ka gooni ah maxaabiista kale ee laga soo xirey ciidamada.
2) Maxaabiista ku eedaysan dembiyada waaweyn ee ciqaabtoodu gaarayso toban (10) sano oo xabsi ah iyo ka sii badan; waxaa lagu haynayaa meel ka duwan meelaha lagu hayo maxaabiista kale ee loo haysto tuhun ama dembi yar.
3) Saraakiisha laga soo xiro ciidanka ee aan ku eedaysneyn wax la xiriira argagixiso waxaa lagu haynayaa meeshii suuragal ah iyo si ka duwan maxaabiista kale ee askarta ah.
4) Haweenka ku jira gacanta Hay'adda waxaa lagu haynayaa qeyb ka gooni ah qeybaha maxaabiista ragga ah ay ku jiraan oo leh ilaalo hoosaad dumar ah, isla markaana u xilsaaran nidaamintooda iyo daryeelkooda, waxaana loola dhaqmayaa si waafaqsan Qodobka 37aad (5) ee Sharciga HSNQ.
5) HSNQ waxay la soconaysaa, dabagal iyo qiimayna ku samaynaysaa dhammaan xubnaha ku xukuman fal argagixisinimo ama afkaar iyo caqiido argagixiso inta ay xabsiga ku jiraan iyo kadib marka muddada xukunka ay dhammaystaanba.

## Qodobka 43aad
## Xuquuqda Dadka Ay Hay'addu Hayso

Eedaysanayaasha ku jira xarumaha baarista Hay'adda ama la soo qabto, waxay leeyihiin xuquuqda ku xusan Qodobka 35aad ee Dastuurka KMG, Qodobbada Sharciga HSNQ gaar ahaan Qodobka 37aad iyo Qodobka 39aad, Qodobada Sharciga La-dagaallanka Argagixisada iyo sharciyada kale ee dalka.

## Qodobka 44aad
## Fatashaadda Maxaabiista

Maxbuus kasta markii uu xabsiga soo gelayo iyo xilli kasta oo kale oo Taliyaha baaristu u arko, waxaa lagu sameynayaa fatashaad, isla markaana maxaabiista waxaa laga reebayaa ama laga qaadayaa waxyaabaha mamnuuca ah ee lagu helo.

## Qodobka 45aad
## Hantida Iyo Alaabta Maxaabiista

1. Wixii hanti ah ama alaab kale ah oo waxtar leh ee laga helo maxbuuska, isla markaana aan ahayn mid dembi lagu galay ama la tuhunsan yahay in dembi lagu galay; maxbuuska waa loo haynayaa waana loo xifdinayaa, haddii uu codsado in ehelladiisa ama asxaabtiisa loogu dhiibana Taliyaha baarista ama ciddii kale ee uu wakiisho ayaa go'aan ka gaari kara.
2. Wixii alaabo ah oo maxbuuska laga helo, haddii ay tahay mid aad duug u ah ama aan dhigmi karin ama loo arko in ay cudurro faafin karaan; waxaa la amrayaa in la baabi'iyo, maxabuuskana waa lagu wargelinayaa, wax magdhow ahna ma yeelanayo, sida ku xusan Qodobka 20aad ee Xeerka Xabsiyada iyo Qodobka 14aad ee Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada dalka.

## Qodobka 46
## Nadaafadda Xarumaha Baarista

1. Si loo dhawro nadaafadda guud ee xarumaha baarista Hay'adda waa in qolalka ama hoolalka maxaabiista lagu hayo ay yeeshaan musqulo ku filan, waana in nadaafadda xabsiyada la ilaaliyo, gaar ahaan qololka jiifka, musqulaha iyo jikooyinka.
2. Maxbuus kasta waxaa xil ka saran yahay nadaafadda iyo daryeelka jirkiisa, gogoshiisa, dharkiisa, weelasha uu wax ku cuno iyo dhammaan alaabaha uu adeegsado.
3. Qololka iyo hoolalka maxaabiista lagu hayo waa in xilli ka mid ah maalinta inteeda hore irdaha iyo dariishadaha loo furo, si ay maxaabiistu u qoraxaystaan ama ay hawo nadiif ah u qaataan.

## Qodobka 47aad
## Nolosha Iyo Daryeelka Maxaabiista

1. Maxbuus kasta ee gacanta Hay'adda ku jira, wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garaan cunto ah oo uu ku baahi beeli karo iyo biyo uu cabo oo ku habboon, si waafaqsan xeer-hoosaadka Hay'adda.
2. Maxaabiista waxaa loo oggolaan karaa in xilliyada qaar cunto bannaanka looga keeno, iyadoo laga ambaqaadayo talooyinka dhaqtarka ama xaalad kale.
3. Maxaabiista waxaa la siinayaa gogol (firaash) ku habboon oo awoodda dhaqaale ay saamaxayso.
4. Huga (dharka) xabsiyadu waa in uusan noqon mid qofnimada maxbuuska waxyeelayn kara ama hoos u dhigi kara, waana in ugu yaraan todobaadkiiba mar la dhaqo.
5. Meeshii iyo markii ay suuragal tahay maxaabiista waa in fursad loo siiyo inay qubeystaan ugu yaraan todobaadkiiba labo mar iyo markasta oo ay waajib tahay, si kastaba, maxaabiistu waa inay korkooda (oogadooda) nadiifiyaan lana siiyo biyo iyo saabuun hadba sida awooddu tahay.
6. Dhammaan maxaabiista kuwa caafimaad darro darteed looga reebay ma ahee, waa inay helaan jimicsi hadba sida uu ku taliyo Taliyaha baaristu.
7. Dhanka kale, wax kasta oo meel ka baxsan xabsiga looga keeno maxaabiista waa in si dhamaystiran loo baaro.

## Qodobka 48aad
## Booqashada iyo Xiriirka Ehellada Maxaabiista

1. Ehellada maxaabiista waxaa loo oggolaanayaa inay soo booqdaan ama inay maxaabiistu la xiriiraan ehelladooda iyo ciddii kale oo loo arko waqtiga iyo sida loo cayimo, si waafaqsan Qodobka 37aad, faqradaha (1) iyo (6) ee Sharciga HSNQ.
2. Marka kasta oo maxbuuska ehelladiisa ama ciddii kale ee loo oggolaado ay soo booqanayaan ama ay la xiriirayaan waa inuu goob-joog ahaado xubin ka tirsan saraakiisha baarista Hay'adda.

## Qodobka 49aad
## Cabashada Maxaabiista

Maxbuus kasta oo xarumaha baarista Hay'adda ku jira, wuxuu xaq u leeyahay inuu si keli ah cabasho ama ashtako ugu soo gudbisto Taliyaha baarista Hay'adda ama ciddii kale ee Xeerku oggol yahay.

## Qodobka 50aad
## Daryeelka Bukaannada iyo Takoorka Maxaabiista Qaba Cudurrada Faafa

1. Bukaannada maxaabiista waxaa la siinayaa daryeel caafimaad intii suuragal ah.
2. Maxaabiista qaba ama laga helo cudurrada faafa, waxaa loo sameynayaa meel gaar ah oo lagu takooro, si looga hortago in cudurku ku faafo maxaabiista kale ama hawlwadeenada xarumaha baarista.
3. Maxaabiista qaba ama uu ku dhaco cudur halis ah; Taliyaha baaristu wuxuu u oggalaan karaa in lagu daweeyo isbitaal ka baxsan daryeelka caafimaadka Hay'adda, markii uu sidaas dhaqtarku ku taliyo ama ay xaalad Degdeg ah jirto.
4. Bukaannada maxaabiista ee loo oggolaado in lagu daweeyo isbitaal Hay'adda ka baxsan, si waafqasan faqradda saddexaad (3) ee Qodobkan; waa in Taliyaha baaristu qaado tallaabooyinka iyo wadiiqooyinka lama huraanka ah si looga hortago fakashada maxbuuska ama inuu xog ka helo ama u gudbiyo cid kale.

## Qodobka 51aad
## Adeegsiga Xoogga

1. Ciidanka u xilsaaran ilaalada xarumaha baarista iyo maxaabiista Hay'adda waxaa ka reebban adeegsiga xoog aan loo baahnayn, haddii loo baahdo isticmaalka xoog, waa in ujeeddadiisu ku kooban tahay daryeelka, xasillinta iyo nabadgalyada maxaabiista iyo xarumaha baarista Hay'adda.
2. Ciidamada faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, markii ay waajibaadkooda shaqo gudanayaan waxaa ka reebban inay maxaabiista kula kacaan ama kula dhaqmaan anshax-xumo, daandaansi, awood sheegasho iyo xadgudb kasta oo bani-aadannimada ka baxsan.

3. Ciidanka ilaalada xarumaha baarista iyo maxaabiista Hay'adda waxaa u furan in ay awood adeegsadaan markii ay lama huraan noqoto, si maxbuuska loogu soo dabbaalo ilaalinta nidaamka iyo kala dambaynta.
4. Ciidanka ilaalada ee faqradda (1) ee Qodobkaan ku xusan markii ay hub u adeegsanayaan maxbuus fakaday ama iskudayay inuu fakado ama awood adeegsaday; waa in aysan hub adeegsan ilaa ay ka xaqiijiyaan in aysan heli karin wadiiqad kale, isla markaana waa in aysan xabad ku ridin ayagoon maxbuuska u digin ama ku wargelin inay xabad ku ridi doonaan.
5. Waxaa waajib ah markii hub la adeegsanayo in lagu ekaado ama aan la gudbin hadba inta baahidu tahay.
6. Xaaladaha hubka la adeegsan karo waa kuwa ku xusan Qodobka 44aad (3) ee Xeerka Xabsiyada.
7. Haddii awoodda la adeegsaday ay keento ama ay sababto waxyeello daran ama waxa la adeegsaday uu yahay hub; Taliyaha baarista waxaa saaran in si aan daahid lahayn baaris ugu sameeyo dhacdada, waxa sababay iyo dhammaan duruufaha ku xeeran, ka dibna uu la wadaago Taliyaha Guud ee Hay'adda iyo hay'adaha Garsoorka ee awoodda u leh.

## Qodobka 52aad
## Dembiyada Xabsiyada

1. Maxbuus kasta ee la yimaada ama ku dhaca mid ka mid ah arrimaha ku xusan Qodobka 47aad ee Xeerka Xabsiyada; waxaa loo aqoonsanayaa qof ku dhacay mid ka mid ah dembiyada yar-yar ee xabsiyada.
2. Maxbuuskii ku dhaca ama la yimaada mid ka mid ah arrimaha ku xusan Qodobka 48aad ee Xeerka xabsiyada, asna waxaa loo aqoonsanayaa qof ku dhacay dembiyada waaweyn ee xabsiyada.

## Qodobka 53aad
## Anshax-marinta Maxaabiista

1. Markii uu maxbuus ku dhaco mid ka mid ah dembiyada xabsiyada, Taliyaha baaristu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka soo socda:
   a) Wuxuu amrayaa in maxbuuska eedda loo haysto kaligiis lagu xiro meel ka gooni ah maxaabiista kale;

b) In si degdeg ah oo aan daahid lahayn loo baaro isla markaana la aruuriyo caddaymaha ku aaddan eedda loo soo jeediyey maxbuuska, ka dibna waxaa laga diyaarinayaa warbixin lagu go'aan qaadan karo;
c) Maxbuuska waxaa lagu wargelinayaa eedda loo haysto, waxuuna xaq u leeyahay in fursad loo siiyo inuu iska difaaco eedda;

2. Maxbuuskii ku dhaca mid ama ka badan oo ka mid ah dembiyada xabsiyada; Taliyaha baarista wuxuu u anshax-marin karaa si waafaqsan Qodobka 50aad iyo 51aad ee Xeerka Xabsiyada.
3. Anshax-marinta maxaabiista haweenka ah, waxaa loo xilsaarayaa Askar haween ah.
4. Maxbuuskii ku dhaca dembiyada xabsiyada ee ku xusan Qodobka 52aad ee Xeer-nidaamiyahan, lagama qaadi karo tillaabo anshax-marin ah oo aan waafaqsanayn xeerka.

## Qodobka 54aad
## Dhimashada Maxbuuska

Haddii qof maxaabiista ka mid ah uu geeriyoodo waa in sida ugu dhaqsiyaha badan lagu wargeliyo dhinacyada soo socda:

1. Hay'adda Garsoor ee awoodda u leh;
2. Ehellada ugu dhaw ee maxbuuska geeriyoodey.
3. Waxaa baaritaan dhammeystiran lagu sameynayaa sababta dhimashada maxbuuska, si Taliyaha HSNQ loogu Gudbiyo warbixin uu ku go'aan qaadan karo.

## Qodobka 55aad
## Xarumaha Dhaqancelinta Xubnaha Argagixisada

1. Xarumaha dhaqancelinta ujeeddadooda waxaa ka mid ah:
    a) In barnaamijyada xarumaha dhaqancelinta xubnaha argagixisada ay yeeshaan, tiirar iyo qeybo kala duwan oo isku xiran, isla markaana isugu jira dhaqancelin, wacyigelin diini ah, waxbarasho, anshaxcelin, xog helid iyo dib ula falgal bulsho.
    b) In xubnaha kasoo goosta ama iska soo dhiiba kooxaha iyo ururada argagixisannimada ku astaysan ee ku xusan lifaaqa 1aad ee Sharciga

La-dagaallanka Argagixisada ama sheegta inay ka soo laabteen afkaarta xagjirnimada; loo diyaariyo inay bulshada dib ula falgalaan, isla markaana ay ehelladooda dib ula midoobaan, ka dib markii hubin amni iyo dhaqancelin lagu sameeyo;

c) In laga wacyigeliyo lagana tirtiro afkaarta xagjirka ah ee maankooda ku tallaalantay;

d) In xubnaha kale ee kooxaha argagixisada ku maqan, lagu dhiirageliyo inay iskood isku soo dhiibaan ama ay argagixisada uga soo baxaan.

2. Dhammaan xarumaha iyo barnaamijyada dhaqancelinta xubnaha argagixisada ee dalka ka jira, waxay hoos tagayaan HSNQ, Hay'adda ayaana jihaynaysa, isla markaana dajinaysa istiraatiijiyada iyo siyaasadda waddaniga ah ee barnaamijyada xarumaha lagu dhaqacanceliyo laguna wacyigeliyo xubnaha ka soo noqda ama kasoo goosta argagixisada.
3. Xarumaha faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, waxaa ka hawlgelaya dad aqoon iyo waaya-aragnimo u leh qaabka wacyigelinta xagjirnimada iyo ka hortagga afkaarta argagixisada, kana soo saari kara xogaha waxtarka u leh amniga qaranka, isla markaan akhrin kara nafsiyaadka xubnaha iyo heerarka khatartooda.
4. Xubnaha la dhaqancelinayo ee ka yimaada kooxaha ama ururrada argagixisada waa inay xarumaha dhaqancelinta ku jirayaan ugu yaraan hal sano, ka hor inta aan bulshada dib loogu celin.
5. Xubnaha kasoo baxa kooxaha argagixisada markii ay dhammeystaan barnaamijyada dhaqancelinta ah ee loogu talagalay, ka hor inta aan bulshada dib loogu celin; waa in qiimayn amni lagu sameeyo heerka halistooda.
6. Xeer-ilaalinta CQS, waa inay baarista Hay'adda la soo wadaagto dhammaan magacayada xubnaha aragagixisada ee xukunku ku dhacay.
7. Hay'addu waxay la soconaysaa, kor-joogtaynaysaa, ka warqabaysaa, isla markaana ay qiimaynaysaa dhammaan xubnaha ku saamoobay afkaarta argagixisada ee ay u dhammaatay muddada dhaqancelinta.
8. Barnaamijyada dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha, si ay u noqdaan kuwa boqolkiiba boqol (100%) ku salaysan danta iyo qorshaha Qaranka; waa in Xukuumaddu u qoondayso madax miisaaniyeed u gaar ah maamulka iyo maaraynta barnaamiyada iyo xarumaha dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha oo ka mid ah miisaaniyadda guud ee HSNQ, si looga maarmo faragalinta

taban ee ka imaan karta hay'adaha deeqaha-bixiya iyo fulinta qandaraasyada faa'iidada iyo danta aan u ahayn barnaamijyada dhaqancelinta.

9. Wixii faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan hannaanka maaraynta iyo maamulka xubnaha isa-soo dhiibayaasha iyo xarumaha dhaqancelinta waxaa loo raacayaa, si waafaqsan Habraaca diiwaangeinta iyo dhaqancelinta isa-soo dhiibayaasha HSNQ.

# CUTUBKA SHANAAD
# DHISMAHA IYO NIDAAMINTA GUDDIGA ANSHAX-MARINTA EE HSNQ

## Qodobka 56aad
## Xeerinta Anshax-marinta Xubnaha Hay'adda

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee sharciga HSNQ xubin kasta ee ka tirsan ciidanka HSNQ oo ku dhaca fal liddi ku ah ama wax u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka ciidannimo, waxaa anshax-marinaya Guddi Anshax-marin oo ay Hay'addu yeelaneyso iyadoo loo cuskanayo Qodobada anshax-marineed ee XN-HSNQ tilmaamayo.

## Qodobka 57aad
## Qaab-dhismeedka Guddiga Anshax-marinta

1. Guddiga Anshax-marinta Hay'addu wuxuu ka koobnaanayaa todoba (7) xubnood oo kala ah sida soo socota:
   a) Kaaliyaha Amniga Hay'adda == (Guddoomiye).
   b) Agaasimaha Baarista Hay'adda ======== (Xubin).
   c) Agaasimaha dabagalka ======== (xubin).
   d) Agaasimaha Waaxda Maamulka Ciidanka ======== (Xubin).
   e) Saddex (3) sarkaal oo sare ======== (Xubno).
2. Tirada Guddiga Anshax-marinta ee faqradda (1) qodobkan ku xusan; Taliyaha Hay'addu wuxuu ku dari karaa (ku kabi karaa) qof ama labo kale markii ay la hobboonaato, xubnaha kabka ah waxay yeelanayaan cod la mid ah kan xubnaha asalka ah, hase ahaatee, markii xubno dheeri ah guddiga lagu kabayo, waxaa lagu dadaalayaa in tirada guddigu ahaato kinsi (hal-dheeri).

3. Guddoomiyaha guddiga marka uu maqan yahay ama uuna ka soo qeyb geli karin kulannada guddiga, sabab kasta oo ay tahay, waxaa kaalintiisa buuxinaya Taliyaha Baarista Hay'adda.

## Qodobka 58aad

## Guntanka (Kooramka) iyo Habka Go'aannada Guddiga Anshax-marinta

1) Markii eeddu tahay mid culus kooramka guddigu wuxuu ku guntami karaa inay ka soo qeyb-galaan dhammaan xubnaha guddiga ee todobada (7) xubnood ah iyo xubnihii kale ee Taliyuhu ku kabo, marka ay eeddu tahay mid fudud, waxuu kooramku ku guntami karaa shan (5) xubnood iyo xubnaha kabka ah haddii ay jiraan.
2) Go'aannada Guddigu waxay kusoo baxayaan si aqlabiyad ah (cod hal dheeri ah: 50+1).
3) Haddii tirada codadku noqdaan kuwa siman, waxaa la raacayaa hadba dhanka uu guddoomiyaha Guddigu jiro.
4) Go'aan kasta oo Guddiga ka soo baxa waxuu noqonayaa mid la sababeeyey, ka dib markii baaris iyo xaqiijin ku filan ay Guddigu sameeyaan.
5) Gudiga Anshax-marintu kiisaska dabeecadda ciqaabta ah leh; wuxuu u wareejinayaa Xeer-ilaalinta ciidamada.
6) Guddigu markasta oo loo baahdo, wuxuu soo saarayaa tallaabooyinka lama huraanka u ah meel-marinta warbixinta Guddiga.
7) Qofkii ku qanci waaya warbixinta Guddiga Anshax-marinta waxaa u furan inuu Taliyaha HSNQ cabasho (dib-u-eegis ah) u gudbisto, cabashadiisana waa in Taliyaha loo gudbiyo, Taliyaha Hay'adduna wuxuu gaari karaa go'aan ka gadisan warbixinta Guddiga.

## Qodobka 59aad

## Xaaladaha Xubinta loo Wareejinayo Guddiga Anshaxa

Gudiga Anshax-marinta HSNQ waxaa loo gudbin karaa xubin kasta oo ka tirsan HSNQ oo ku dhaca mid ka mid ah arrimaha soo socda:

1. Xadgudubyada ka dhanka ah Qodobada Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan;
2. Faldembiyeed;

3. Gefefka liddiga ku ah go'aannada iyo amarrada madaxda HSNQ;
4. Gefefka liddiga ku ah Anshaxa iyo Asluubta Ciidannimo;
5. Burbirin ama hawl-gab ka dhigid ama si qaldan u adeegsi hanti ay HSNQ leedahay ama sabab u noqosho in ay lunto ama ay dayacanto;
6. Dayaca ama xatooyada ama lunsashada hubka, rasaasta iyo agabka kale ee lagu aaminey ama loo xilsaarey;
7. Sameyn ku-takrifal awoodeed ama ka-faa'iideysi shaqo ama ku dhicid dhaqan xumo ama fal aan ku habboonayn ama wax yeelayn kara shaqada Hay'adda iyo sumacadda ciidanka HSNQ;
8. Ka fakasho shaqada; iyo
9. Maqnaasho fasax la'aan ah muddada ku xusan Xeerkaan.

## Qodobka 60aad
## Go'aannada Guddiga Anshax-marinta

Go'aannada Gudiga Anshax-marintu waxay noqon karaan arrimaha hoos ku xusan:

1. U dirid ganaax-asluubeed; ama
2. U wareejin Baarista HSNQ, haddii ay caddaato in eeddu ka baxsan tahay awoodda Guddiga Anshax-marinta.

## Qodobka 61aad
## Nidaamka Guud ee Anshax-marinta

1. Markii anshax-marin la sameynayo ama la qaadayo gef asluubeed; waxaa la sugayaa cadaaladda, isla markaana, waxaa laga dhawrsanayaa eex iyo ku-tagrifal awoodeed, si ay taasi u suuragashana, waa in xubinta la anshax-marinayo, la siiyaa fursad uu ku sharraxo eedda loo tiirinayo, waana in la tixgeliyaa dhammaan duruufaha iyo xaaladaha ku gedaaman gefka iyo gefaha.
2. Markii xubin ciidan ah la anshax-marinayo, waa in loo tixgaliyaa akhlaaqdiisii hore iyo waaya-aragnimadiisa shaqo, sidaasi darteed, markii xubin gef ku dhacay la ganaaxayo, waa in la eego galkiisa ciidan.
3. Madaxda ama taliyeyaasha ciidammadu qofna ma saari karaan ganaax ama ciqaab ka duwan midda ku xusan xeerkan, mana siin karaan ganaax ka baxsan awooddooda, mana dhaafsiin karaan ganaaxa xadka loo gooyey.

4. Taliye ciidan kasta ee ogaada xubin ka tirsan ciidanka hoos yimaada inuu ku dhacay ama ay muuqato inuu gelayo gef Asluubeed ama fal-dembiyeed; waa inuu si aan daahid la hayn tallaabo uga qaadaa haddii uu awoodo, ama uu amraa in cidda awoodda u leh la horgeeyo.
5. Taliyihii aan tallaabo ka qaadin xubinta gefka gashay si waafaqsan faqradda (4) ee Qodobkan; wuxuu ku dhacay dayacaad mas'uuliyad, waxaana laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga.
6. Qofka madaxda ah ama taliyaha ah ee ganaaxa xubin ka tirsan ciidanka, waa inuu si degdeg ah ugu diraa cidda ay khuseyso, iyadoo qoran.

## Qodobka 62aad
## Xuquuqda Qofka Eedda loo Haysto

Xubin kasta oo lagu soo eedeeyo inuu ku dhacay gef wuxuu xaq u yeelanayaa oo loo tixgelinayaa arrimaha soo socda:

1. Waa in la ogeysiiyo eedda loo haysto oo faahfaahsan.
2. Fadhiga Guddigu ma guntami karo, iyadoo aysan kasoo wareegin ugu yaraan 3 (saddex) maalin xilliga xubinta la ogeysiiyey eedda loo haysto.
3. Waa in la dhageysto oo fursad loo siiyo inuu iska difaaco eedda loo haysto, si oraah ah ama qoraal ah ama labadooda oo wada jira.
4. Wax ganaax ahna laguma ridi karo iyadoon la dhageysan difaaciisa ama cabashadiisa.
5. Markii go'aanka laga gaarayo xubinta ciidanka ka tirsan waxaa loo tixgelinayaa khibarradiisa iyo akhlaaqdiisa wanaagsan.

## Qodobka 63aad
## Waxyaabaha ka Reebban Xubinta Eedda loo Haysto

1. Xubinta Eedda loo haysto waxaa ka reebban inuu ka maqnaado fadhiyada (kulammada) anshax-marinta ee loogu yeero, haddii uusan jirin cududaar uu Guddigu aqbali karo.
2. Haddii qofka eedda loo haysto uu ka maqnaado laba kulan oo lagu wargeliyey; Guddigu wuxuu soo saarayaa go'aankiisa qofka oo maqan.

## Qodobka 64aad
## Muddo-dhaafka Eedda

1. Eedda loo haysto xubin ka tirsan ciidanka, way dhacaysaa loomana raacan karo; haddii ay ka soo wareegto muddo dhan soddon (30) maalin laga soo billaabo marka uu taliyihiisa ama madaxdiisu ogaatay gelitaanka gefka, hase yeeshee, haddii habka iyo tallaabooyinka anshax-marintu billaabato muddada baarista iyo go'aan gaaristu kama badnaan karto (45) maalin.
2. Muddada baaristu socoto xubinta eedda loo haysto xuquuqda xubinnimo ma luminayo.

## Qodobka 65aad
## Gelidda Fal Dhalin Kara Ganaax Asluubeed ama Faldambiyeed Culus

1. Iyada oon waxba loo dhimeyn dacwad kasta oo ciqaab ah ama madani ah oo la oogey, si waafaqsan xeerarka ciqaabta iyo xeerka madaniga iyo xeer kasta oo kale ee dalka; qof kasta oo xubin ka ah Ciidanka HSNQ ee ku dhaca gef-asluubeed waxaa lagu ciqaabayaa Ganaaxyada Asluubeed (Dishibiliineed) ee ku xusan Xeerkan;
2. Ganaaxyada Asluubeed ee xeerkan ku xusan waxaa lagu ganaaxayaa gefafka ka dhaca ciidanka HSNQ, isla markaana liddi ku ah amarrada, gudashada waajibaadka shaqada, xirfadda ciidannimo, derejada ciidanka, labbiska, anshax-wanaagga, sharafta iyo dhammaan gefefka asluubeed ee ay ciidammadu galaan.
3. Qof kasta oo ka tirsan ciidanka HSNQ ee ku dhaca fal-dambiyeed culus oo ciqaabtiisu ka weyn tahay gef Asluubeed, isla markaana dembi ku ah shuruucda dhaqangal ka ah dalka; waxaa kiiskiisa ka garnaqaya Maxkamadda awoodda u leh.
4. Eed walba oo ku dhammaata maxkamad, ayna maxkamaddu go'aan kama dambeys ah ka soo saarto; waa in go'aanka maxkamadda sida uu yahay loo meel-mariyo (loo fuliyo).

## Qodobka 66aad
## Ganaaxyada Asluubeed Iyo Cidda Bixin Karta

1. Ganaaxyada Asluubeed ee Sarkaal ama Askari shaqo ku jira oo ka tirsan Ciidanka HSNQ la marsiin karo; waa sida hoos ku xusan:
   a) Waano;
   b) Canaan afka ah;
   c) Digniin adag (culus), digniinta culus waxaa lagu bixinayaa qoraal, waxaana la gelinayaa galka qofka gefka ku dhacay;
   d) U diris shaqo dheeri ah oo aan ka badneyn 30% sacadaha shaqada
   e) Fasax ka joojin hal mar ah;
   f) Xarig 1 ilaa 10 maalmood ah;
   g) Ka bixid la'aan xerada 1 ilaa 28 maalmood ah (Sarkaalka);
   h) Dhimis Mushaar 1/3 (saddex meelood meel);
   i) Xarig 1 ilaa 40 maalmood ah;
   j) Feer-celin 21 ilaa 60 maalmood ah (u dirid dugsiga Tababarrada);
2. Waanada iyo canaanta waxaa bixin kara taliye ama madax kasta, waxaana la bixinayaa marka gefka la galay uu yahay mid fudud.
3. Ganaaxyada ku xusan xarfaha (A ilaa F) waxaa bixin kara Taliyaha uu hoos tago xubinta ciidanka ka tirsan ee gefka ku dhacay.
4. Ganaaxyada ku xusan xarfaha (G ilaa J) waxaa bixin kara Taliyaha HSNQ ka dib soo jeedinta Guddiga Anshax-marinta.

## Qodobka 67aad
## Xabsi Ku-meel-gaar ah

Xubin kasta oo si ku-meel-gaar ah loo xiray waxaa laga joojinayaa shaqada inta uu xiran yahay, iyadoon mushaarkiisa la jarin inta Guddigu go'aan ka gaarayo kiiskiisa.

# CUTUBKA LIXAAD
# FASAXYADA, MAQNAASHO FASAX LA'AAN IYO FAKADKA

## Qodobka 68aad
## Noocyada Fasaxyada

Noocyada fasaxyada ee xubnaha Hay'addu qaadan karaan, waa sida hoos ku xusan:

1. Fasaxa sanadlaha ah;
2. Fasaxa umusha;
3. Fasax waxbarasho;
4. Fasax caafimaad; iyo
5. Fasax gaar ahaaneed.

## Qodobka 69aad
## Fasaxa Sanadlaha Ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ waxay xaq u leedahay inay hesho fasax sanadeed caadi ah lehna mushaar dhan (buuxa) soddon (30) bari sanadkiiba.
2. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah ama baahi kale oo aan looga maarmi karin, xubin kasta oo ku jira fasax; Taliyaha Hay'adda ama ciddii uu u wakiisho ayaa shaqada ugu yeeri kara.
3. Xubintii xaalad degdeg ah awgeed shaqada loogu yeero, asagoo fasixiisii ku jira, waxaa waqtiga fasaxa uga dhimman la siinayaa mar kale oo ku habboon, xafiiska uu hoos tago ayaana go'aaminaya ama bedel kale oo u dhigma ayaa la siinayaa.

## Qodobka 70aad
## Fasaxa Umusha

Xubnaha haweenka ah ee ka tirsan HSNQ waxay xaq u yeelanayaan inay qaataan fasaxa umusha oo xubintu mushaarkeeda qaadaneyso, muddada fasaxa umushu waa afar (4) bilood oo ka billaabanaysa waqtiga ay xubintu codsato.

## Qodobka 71aad
## Fasax Waxbarasho Dalka Dibadiisa ah

1. Xubin kasta oo Hay'adda ka tirsan oo hela fursad waxbarasho oo dalka dibaddiisa ah, isla markaana ay Hay'addu siisey ama hay'adaha kale dawladda ama deeq waxbarasho oo dibadda ah ama asagu iska bixinayo; waa:
    a) Inuu Hay'adda ka tirsanaa muddo aan afar (4) sano ka yareyn, hase ahaatee, haddii ay Hay'addu baahi taagan u qabto nooca shaqadiisa, xubintaas waxaa loo diri karaa waxbarasho dibadda ah, asagoon gaarin muddada ka mid ahaanshaha Hay'adda ee sare ku xusan.
    b) Inuu saxiixo heshiis (damaanad) ah inuu shaqada Hay'adda kusoo noqonayo markii uu soo dhammeysto fasaxa waxbarasho.
    c) Markii uu xubintu waxbarshada soo dhamaysto waa inuu Hay'adda u shaqeeyo ugu yaraan muddo saddex (3) sano ah.
    d) Haddii ay xubin waxbarasho soo dhamaysatey la soo gudboonaato duruuf keeni karta in uusan sii shaqayn waxaa go'aan ka gaari kara Taliyaha Hay'adda.
2. Xubin kasta oo ay Hay'addu u dirto waxbarasho dibadda ah, muddada uu ku maqanyahay fasaxa waxbarasho; wuxuu yeelanayaa saldhigga mushaarkiisa iyo qoondadii Taliyuhu u garto.
3. Xubnaha aysan Hay'addu u dirin waxbarashada, isla markaana la siiyo fasax waxbarasho; wuxuu yeelanayaa saldhigga mushaarkiisa oo keli ah.
4. Fasaxa waxbarashada waxaa bixin kara Taliyaha Hay'adda, ka dib marka uu soo dhammaado hannaanka oggolaashaha.
5. Qofkii shaqada kusoo noqon waaya oo jabiya heshiiska dammaanada; waxaa laga rabaa inuu dib u bixiyo wixii qarash ah ama xuquuq ah ee dawladdu ku baxisay muddadii uu waxbarashada ku maqnaa.
6. Qofka codsanaya fasaxa ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waa inuu keenaa dokumentiyada lama huraanka ah oo dhammeystiran, sida:
    a) Shahaadada Jaamcadda ama dugsiga sare;
    b) Aqbalaadda Jaamacadda uu waxbarashada u aadayo; iyo
    c) dal-ku-galka (fiisaha) ardaynimo.

## Qodobka 72aad
## Fasaxa Caafmaadka

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ oo ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad darro ah oo uusan waajibaadkiisa shaqo la gudan karin, madaxdiisa ayuu si qoraal ah ama oraah ku wargelinayaa asagoon xaaladiisa ka been sheegin, waxaana loo dalbayaa fasax caafimaad.
2. Markii loo baahdo, Hay'addu waxay hubin ku samayn kartaa xaaladda caafimaad ee xubinta codsiga soo gudbistey, iyadoo adeegsaneysa dhakhaatiir ay ku kalsoon tahay, ka dibna go'aanka fasaxa caafimaadka ee xaaladda hubinta lagu sameeyey la xiriira, waxaa lagu go'aan qaadanayaa warbixinta dhakhaatiirta.
3. Haddii, ay muuqato ama loo arko bukaanka jirradiisa mid aan laheyn ka soo kabasho dhow; xubinta bukaanka ah waxaa laga joojinayaa shaqada ama xilka uu ku magacaaban yahay, waxaana lagu darayaa dadka ku jira xanaanada iyo daryeelka Hay'adda.
4. Haddii ay tahay cidda xanuunsan ehelka dhow ee xubinta waxaa la siin karaa fasax labo (2) usbuuc oo ah muddada baxnaaninta bukaanka iyo u diyaarinta ciddii kale ee kala wareegi lahayd bukaanka haddii bukaanku ku bogsan waayo muddadaas.

## Qodobka 73aad
## Fasax Gaar ah

Fasax gaar ah, waa fasax loo bixiyo sababo gaar ah awgood, waxaana bixinaya Agaasimaha Guud (Taliyaha) ee Hay'adda ama ciddii uu u wakiisho.

## Qodobka 74aad
## Habka Codsiga Fasaxyada

1. Xubintii soo buuxisa shuruudaha fasax qaadashada, waxay warqad codsi ah u qoranaysaa cidda ay hoostagto.
2. Cidda lagu soo hagaajiyay codsiga fasaxa ayaa u soo gudbineysa Kaalinka Arrimaha Maamulka.
3. Hadii xubinta uu ku soo noqon waayo muddada fasaxa ee sharciga ah, Xafiiska ciidanka waa inuu raadiyaa xiriirka iyo xogta ku saabsan qofkaas

kana soo warbixiyaa, ka dibna waxaa la waafajinayaa Qodobbada Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 75aad
## Ku Daahidda Fasaxa

Xubin kasta oo ku daaha fasax sabab aan macquul ahayn, iyadoon waxba loo dhimayn wixii ciqaab asluubeed ah, waxa uu ka dhigan yahay inuu ku jiray fasax aan caadi ahayn oo lacag la'aan ah.

## Qodobka 76aad
## Maqnaashaha Sarkaalka Fasax La'aan

1. Maqnaashaha sarkaalka fasax la'aan waxaa loo kala saarayaa laba qeybood:
   a) Maqnaasho fasax la'aan oo waqti kooban ah; iyo
   b) Fakad.
2. Sarkaalkii/mudanihii xaruntiisa shaqo ka maqnaada muddo ka badan 3 (saddex) maalin oo xiriir ah oggolaansho la'aan; waxaa loo aqoon sanayaa qof maqan fasax la'aan.
3. Agaasinka ama xafiiska uu ka tirsan yahay xubinta, ayaa xiriirkiisa raadinaya, haddii la waayo xirrirkiisa muddada ku xusan faqarada (2) ee Qodobkan ka dib, waxaa la wargelinayaa xafiiska ciidanka, si loogu asteeyo qof maqan fasax la'aan.

## Qodobka 77aad
## Fakadka Sarkaalka

Sarkaalka ama mudanaha ka tirsan HSNQ, waxaa loo aqoon sanayaa inuu fakad (baxsad) yahay haddii warkiisa la waayo oo uu ka maqnaado xarunta shaqada fasax la'aan muddo toddoba (7) maalin oo xiriir ah iyo ka sii badan.

## Qodobka 78aad
## Maqnaashaha Askariga Fasax La'aan

1. Askariga waxaa loo tixgelinayaa inuu maqan yahay fasax la'aan haddii uu goobtiisa shaqo ka maqnaado muddo labaatan iyo afar saac (24) ah isaga oo aan fasax ka haysan taliyihiisa;
2. Marka la ogaado maqnaashaha Askariga, waa in taliyihiisa uu amraa in fadhiga ama xerada iyo agaraarkeeda laga baaro;
3. Haddii Askarigu ka soo noqdo maqnaashaha fasax la'aanta ah, waa in taliyihiisu wargeliyaa soo noqoshadiisa dhammaan xafiisyadii loo gudbiyey maqnaashihiisa;
4. Askariga marka uu soo noqdo, waxaa anshax-marinaya Taliyaha uu hoos tago si waafaqsan Xeernidaamiyahan.

## Qodobka 79aad
## Fakadka Askariga

1. Askariga haddii muddo 24 saacadood ah laga waayo goobtiisa shaqo, laguna heli waayo baaritaanka ku xusan Qodobka 78aad ee xeer-nidaamiyahan; waxaa la raadinayaa xiriirkiisa, haddii wax jawaab ah laga waayo waxa la weydiinayaa ehelkiisa iyo cid kasta ee xogtiisa laga heli karo, intaas ka dib, haddii warkiisa la waayo muddada iyo habka ku xusan farqadan, waxaa lagu asteynayaa ama loo aqoon sanayaa inuu yahay fakad.
2. Haddii Askariga lagu waayo muddada raadinta, waa in taliyihiishu isla markaas wargeliyaa xafiiska ciidanka una gudbiyaa xogtiisa.
3. Askariga xogtiisa loo soo gudbiyey xafiiska ciidanka ee ku asteysan fakadka, waa in sidoo kale, xogtiisa lala wadaagaa dhammaan hay'adaha iyo xarumaha ay khusayso si looga hortago inuu adeegsado aqoonsiga ciiddannnimo, laguna wargeliyaa in aqoonsigiisa la hakiyey.

## Qodobka 80aad
## Xuquuq Hakin iyo Baafin

1. Qofkii ka maqnaada goobtiisa shaqo muddada ku xusan Qodobbada sare ee Cutubkan, isla markaana la waafajiyey hannaanka ku xusan isla qodobbada

sare; waa in taliyihiisa ama agaasinkiisu u soo gudbiyaa warbixin qoraal ah xafiiska ciidanka.

2. Ka dibna waxaa laga hakinayaa mushaarka ama wixii xuquuq ah ee kale, waxaana la saarayaa baafin.
3. Magaca xubinta fakadka ku asteysan waxaa lagu wargelinayaa taliyeyaasha amniga xarumaha HSNQ.

## Qodobka 81aad
## Dib u Soo Noqoshada Xubinta

1. Haddii xubin lagu asteeyey fakad uu soo noqdo muddo bil gudaheed ah, si ku-meel-gaar ah ayaa loo xirayaa inta go'aan laga gaarayo kiiskiisa.
2. Xubinta fakadka ku asteysan, haddii uu keeno cudurdaar maangal ah oo lagu qancay; fasaxa xuquuqdiisa waxaa go'aan ka gaaraya Taliyaha Hay'adda.

## Qodobka 82aad
## Maqnaashaha Muddo Bil ka Badan

1. Haddii xubinta fakadka ku asteysan uu soo laabto isaga oo maqnaa muddo bil ka badan, isla markaana aan meel lagu ogayn muddadaas, waxaa loo dirayaa baarista Hay'adda.
2. Agaasinka baarista ayaa marsiinaya baaris dhammeystiran oo lagu xaqiiijinayo sababta dhabta ah ee maqnaashihiisa iyo halka uu ku maqnaa.
3. Haddii ay soo baxdo jiritaanka sabab macquul ah oo lagu qanci karo, agaasinka baaristu wuxuu xubintaas ka soo diyaarinayaa warbixin faahfaahinaysa xogta la helay, waxuuna ka qorayaa dokumenti caddayn ah si galkiisa loogu lifaaqo.
4. Hadiise, aan loo helin maqnaanshaha xubinta, sabab maangal ah oo lagu qanci karo; agaasinka baaristu wuxuu soo diyaarinayaa warbixin faahfaahsan oo go'aan lagu qaadan karo.

## Qodobka 83aad
## Go'aanka ugu Dambeeya

Go'aanka ugu dambeeya ee laga gaarayo xubinta Fakadka ku asteysan, waxaa Xeer (Digreeto) ku soo saaraya Taliyaha HSNQ.

# CUTUBKA TODOBAADAAD
# BILLADAHA SHARAFTA IYO ABAALGUDKA XUBNAHA HSNQ

## Qodobka 84aad
## Noocyada Abaalgudyada (Abaalmarinnada) Xubnaha HSNQ

1. Abaalgudka Saraakiisha, Ciidanka iyo dhammaan xubnaha HSNQ la siin karo waxay kala yihiin sida hoos ku xusan:
   a) Ammaan;
   b) Fasax gaaban;
   c) Shahaado sharaf;
   d) Abaalgud Lacageed;
   e) Ammaan loo shirsan yahay;
   f) Billad sharaf geesinimo.
2. Ujeeddada Abaalgudka xubnaha Hay'adda waa inay dhiirrIgelin iyo tusaale u noqoto xubnaha kale ee HSNQ.

## Qodobka 85aad
## Ammaan

1. Ammaanta waxaa la siin karaa xubin kasta oo ka tirsan HSNQ, oo qabta shaqo qiimo gaar ah leh ama si fiiro gooni ah leh u guta waajibaadkiisa ama si hawl-karnimo ah u fuliya amar la siiyey.
2. Ammaantaasna waxaa bixin kara qof kasta oo madax ah, waxaana loo bixinayaa si oraah ah ama qoraal ah.

## Qodobka 86aad
## Abaalgud Fasax ah

Abaalgudka fasaxa ah oo aan aheyn fasixii xubinta u bislaaday, waxaa la siin karaa qof kasta oo HSNQ ka tirsan markii uu ku mutaysto shaqo wanaag iyo karti dheeri ah, si waafaqsan habraaca fasaxa HSNQ.

## Qodobka 87aad
## Shahaado Sharaf

Shahaado sharaf waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ oo muujiya xilkasnimo, hawlkarnimo, asluub wanaag, wadaninnimo iyo aqoon qoto-dheer, waxaana bixiya Taliyaha HSNQ, isagoo ka ambaqaadaya soo jeedinta cidda ay khuseyso.

## Qodobka 88aad
## Abaalgud Lacageed

Abaalgudyada lacageed waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ oo qabta shaqo waxtar weyn iyo qiimo u leh shaqada HSNQ ama ku dayasho mudan, waxaana bixin kara Taliyaha Hay'adda.

## Qodobka 89aad
## Ammaan loo Shirsan Yahay

1. Ammaanta loo shirsan yahay waxaa la siin karaa qof kasta oo ka tirsan HSNQ, waxaana bixiya Taliyaha HSNQ, isagoo kaashanaya soo jeedin ka timid agaasinka ama taliyaha uu qofku hoos tago.
2. Maamuuska ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxaa loo soo saarayaa sidii amar gaar ahaaneed oo ka soo baxay Taliska Guud ee HSNQ, waxaana la ogaysiinayaa dhammaan Kaaliyeyaasha, Agaasinnada, Cutubyada iyo Xafiisyada HSNQ, isla markaana, waxaa la galinayaa galka qofka mutaystaha ah.
3. Ammaan gaar ah si wadajir ah waa loo siin karaa Cutub ama Urur ama Horin dhan oo ciidanka ka tirsan markii ay xilli dagaal soo hooyaan Guul weyn.

## Qodobka 90aad
## Billad Sharaf Geesinimo

1. Billad sharaf geesinnimo waa maamuus la siin karo xubin kasta oo ka tirsan HSNQ, isla markaana sameeya fal geesinnimo ah.

2. Billad sharaf geesinnimo waxaa la mutaystaa marka falka la sameeyey uu yahay mid qiimo weyn u leh Qaranka ama ka hortagay halis weyn oo muuqata oo kusoo wajahneyd Qaranka.
3. Billadda geesinnimo waxaa lagu qiimeynayaa hadba heerka qofka falka sameeyey uu joogo, falka waxyaabaha uu ka kooban yahay, inta ay la egtahay halista la baajiyey iyo guud ahaan, natiijada togan ee ka dhalata falka.
4. Waxaa sidoo kale, Billad sharaf si wadajir ah loo siin karaa Cutub ama Urur ama Horin dhan oo ciidanka ka tirsan markii ay xilli dagaal soo hooyaan Guul weyn.

## Qodobka 91aad
## Noocyada Billad Sharafeedka

1. Noocyada Billadaha ee Abaalgud geesinnimo ahaan loo siin karo xubnaha HSNQ waa sida soo socota:
    a) Xiddigta geesinnimada Soomaaliyeed oo Dahab ah;
    b) Billadda Dahabka ah;
    c) Billadda Qalinka ah;
    d) Billadda Maarta ah;
    e) Dallacaad mutaysi gaar ah.

2. Mutaystaha Xidigta ama Billadda geesinnimada, waxaa kaloo lagu magacaabi karaa: Magaalo, Xaafad, Iskuul, Waddo, Xero Ciidan, Guuto IWM.

## Qodobka 92aad
## Habka Bixinta Billadaha

3. Billadaha iyo Xiddigaha waxaa go'aaminaya Madaxweynaha JFS oo ah Taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida, waxaana lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne, ka dib soo jeedinta Taliyaha HSNQ ee ku aaddan mudnaanta bixinta Abaalmarinta iyo nooca Billadaha maamuuska ah, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin warbixinnada caddeynaya waxyaabaha qiimaha sare leh iyo falka geesinnimada ah ee uu qofku sameeyey.
4. Soo jeedinta Taliyaha Hay'adda waxaa saldhig u noqonaya ra'yiga Guddi Abaalmarineed oo Taliyuhu u magacaabey arrintaas, Guddiga Abaalmarintu

wuxuu ku shaqeynayaa farriimaha iyo jiheynta Taliyaha, si waafaqsan sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.

5. Billadaha maamuuska ah waxaa mutaystaha lagu gudoonsiinayaa xaflad weyn, waxaana lala bixinayaa Shahaado uu saxiixey Madaxweynaha ayna ku qoran tahay sababta loo bixiyey oo kooban.
6. Mutaystaha waa lagala noqonayaa Billadda Abaalmarinta ah marka uu ku dhaco fal liddi ku ah Qarannimada, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

## Qodobka 93aad
## Xaqsiinta Mutaystaha Billadda

Mutaystayaasha Billad sharafeedka, waxaa la siinayaa lacagta ku hor qoran nooca Billada uu mutaystey, qof aan mustaystaha ahayna lama gudoonsiin karo, lagamana ceshan karo, asna qof kale kuma wareejin karo:

1) **Xidigta Geesinnimada**: $50,000 (konton kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
2) **Billadda Dahabka**: $30,000 (soddon kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
3) **Billadda Qalinka**: $20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta;
4) **Billadda Maarta**: $10,000 (toban kun) oo Doollarka Maraykanka ah ama lacag Shilin Soomaali u dhiganta.

## Qodobka 94aad
## Dallacaad Muteysi Gaar ah

Qof kasta oo ka tirsan Ciidanka HSNQ, derejo kasta ha lahaadee, markii uu muujiyo geesinnimo, curin iyo hawl-karnimo dheeri ah xilli hawlgal dagaal lagu jiro ama shaqo Qaran; waxaa la siin karaa Dallacaad muteysi gaar ah, waxaana loo dallacsiinayaa derejada xigta midda uu markaas sito, si waafaqsan xeerarka khuseeya dallacaadda ciidanka.

## Qodobka 95aad
## Maamuusidda Qof Dhintay

1. Haddii uu geeriyoodo qof mutaystey Billad maamuus ah oo sameeyey fal geesinnimo leh ama ku dayasho mudan; Billadda maamuusidda ah waxaa loo bixin karaa xusuus ahaan.
2. Billadaha iyo Shahaadooyinka loo bixinayo maamuusidda iyo xusuusta qof dhintey; waxaa la gudoonsiinayaa ilmihiisa kan ugu weyn, Aabihiis, Hooyyadiis ama Xaaska.
3. Haddii la waayo Ehelada ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan; Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuuska ah waxaa la gudoonsiinayaa Cutubka uu ka tirsanaa.

## Qodobka 96aad
## Samaynta Fal Geesinimo Leh Dhowr Jeer

Haddii hal qof uu dhowr jeer sameeyo fal geesinnimo leh ama ku dayasho mudan, markasta oo ay jiraan sifaalaha (tilmaamaha) muteysiga Billadda ama Abaalmarinta; dhacdo kasta goonideeda ayaa loogu abaalmarin karaa ama loogu maamuusi karaa, iyadoon la eegin inta jeer ee horey loo maamuusey ama loo Abaalmariyey.

## Qodobka 97aad
## Abaalgudka Dadweynaha

Dadka kale ee aan xubinta ka ahayn HSNQ, isla markaana sameeya fal ama qabta arrin qiimo weyn u leh shaqada HSNQ; waxaa la siin karaa Abaalgud iyo dhiirrigelin ku habboon.

# CUTUBKA SIDDEEDAAD
# GEFEFKA ASLUUBEED EE LIDDIGA KU AH WAAJIBAADKA CIIDANNIMO IYO SHAQO

## Qodobka 98aad
## Mas'uuliyadda Ku Xadgudubka Sharciga

1. Qof kasta oo ka tirsan ciidanka wuxuu si shakhsi ah u qaadayaa (xanbaarayaa) mas'uuliyadda qaanuuneed ee ka dhalata tallaabo kasta oo khilaafsan Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan, waajibaadkiisa shaqo iyo amarrada madaxdiisa.
2. Haddii ay caddaato in gefku uu xubinta ka dhacay isagoo fulinya amarka taliyihiisa ama madaxdiisa; waxaa mas'uuliyadda la yeelanaya ciddii amarka bixisay.
3. Hay'addu waxey magdhaw ka bixinaysaa dhibka gaara cid kale oo xubnaheeda ka dhaca iyagoo gudanaya waajibaadkooda shaqo ee rasmiga ah, isla markaana u gudanaya si niyad wanaag ah oo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 99aad
## Feer-celinta Sarkaalka Iyo Askariga

1. Askari kasta ee ku dhaca gef ama fal-dembiyeed oo aan kiiskiisu ku dhammaan maxkamad, isla markaana go'aan laga gaaro; waxaa loo dirayaa dugsiga tababarrada ee HSNQ muddo aan saddex (3) bil ka yarayn, si loogu feer-celiyo.
2. Sarkaal kasta ee ku dhaca gef ama fal-dembiyeed oo aan dacwaddiisu maxkamad ku dhammaan, isla markaana kiiskiisa go'aan laga gaaro; waxaa loo dirayaa dugsiga tababarrada muddo aan 45 maalmood ka yareyn, ka dibna waxaa loo soo wareejinayaa Machadka Daraasaadka Amniga, si loogu feer-celiyo.

## Qodobka 100aad
## Si xun ula Dhaqmidda Ciidanka

1. Qof kasta oo katirsan Ciidanka HSNQ oo dareema in si xun loola dhaqmey ama si daw-darro ah loo ganaaxey wuxuu xaq u leeyahay inuu ka dacwoodo isagoo soo maraya heerarka talinta, ka dib markii uu fuliyo amarka.

2. Dacwad aan laheyn sal ama loo qorey si daw-darro ah ama aan xushmad laheyn waa gef asluubeed oo lagu mudan karo ganaax.

## Qodobka 101aad
## Xaqa Dacwadda iyo Cabashada Xubnaha Hay'adda

1. Xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ama heshiis kula shaqaysa waxay xaq u leedahay inay dacwo ama cabasho ka gudbiso ciddii ku xad gudubta xuquuqdeeda, karaamadeeda iyo amnigeeda, si waafaqsan Qodobka 30aad ee Sharciga HSNQ.
2. Xadgudubyada cabashada laga gudbin karo waxaa kamid ah, balse aan ku koobnayn, dhibaateyn jireed ama maskaxeed, takoorid, hanjabaad iyo u isticmaalidda xogteeda si aan sharci ahayn.

## Qodobka 102aad
## Habraaca iyo Muddada Dacwad Gudbinta

1. Xubinta doonaysa inuu dacwad gudbisto waa inuu dacwad rasmi ah oo qoraal ah u gudbiyo Guddiga Anshax-marinta Hay'adda, dacwaddu waa inay faah-faahsan tahay, haddii ay suurtagal tahayna waa inay caddeyn la socoto.
2. Markii dacwadda la galayo waxaa la ilaalinayaa sirnimada qofka dacwadda soo gudbiyey.
3. Dacawadda waa in la soo gudbiyaa muddo soddon (30) maalmood ah oo ka billaabanaysa taariikhda uu xadgudubku dhacay, haddii ayna jirin sabab maangal ah oo keentay in aan dacwada waqtigaas lagu soo gudbin karin, sababaha daahidda inay maangal tahay waxaa go'aan ka gaaraya Guddiga Anshaxa.
4. Waxaa reebban in xubinta dacwada ama cabashada soo gudbisay lagula kaco tallaabo aarsi u muuqan karta oo ka imaanaya xubinta cidda dacwada laga soo gudbiyay, haddii ay arrintaasi dhacdo waxaa lagu darayaa xadgudubka dacwadda laga soo gudbiyey.
5. Marka Guddiga Anshaxu helo dacwadda xubinta, waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo billaabo baaris lagu aruurinayo macluumaadka dacwada muhiimka u ah iyo xaqiijinta eedaha la soo jeediyey, baaritaankana waa in lagu gabagabeeyaa muddo aan ka badnayn sodon (30) maalmood.

6. Guddiga Anshaxu waxuu warbixin ka diyaariyaa dhammaan heerarka ay dacwaddu soo martay, natiijada baarista iyo goo'aanka guddiga, markii Taliyaha Hay'addu meelmariyana waxaa lagu keydinayaa arkiifiyada Hay'adda.

## Qodobka 103aad
## Adeegsiga Maandooriye

1. Ciidanka HSNQ waxaa ka reebban adeegsiga nooc walba oo maandooriye ah, sida ku cad Qodobka 31aad, faqradda (2), xarafka (x) ee Sharciga HSNQ.
2. Qofkii lagu helo adeegsiga maandooriye waxaa loo dirayaa dhaqancelin 90 maalmood ah oo lagu shaqaynayo.
3. Hadii mar labaad lagu helo adeegsiga maandooriye gebi ahaanba waa laga ruqseynayaa ciidanka HSNQ si waafaqsan Shariga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 104aad
## Shaqo Ka-joojin

1. Qof kasta oo xafiis madax ka ah ama ciidan taliye u ah; wuxuu si ku meel gaar ah shaqo ka-joojin aan xuquuq hakin la socon ku samayn karaa xubnaha hoos yimaada ee aan xil ku magacawnayn, si waafaqsan Qodobka 28aad, faqradiisa (1) ee Sharciga HSNQ.
2. Qaabka xubin HSNQ ka tirasan ama qof Hay'adda u shaqeeya shaqo ka-joojin loogu sameynayo waxaa loo raacayaa XH-HSNQ.
3. Xubinta kasta oo HSNQ ka tirsan ee loo jaro warqad soo qabasho ah, ka dib markii lagu soo eedeeyo fal-dembiyeed ama gef-asluubeed uu ku muteysan karo ciqaab; waxaa waajib ah in shaqo ka-joojin lagu sameeyo, haddii, xubinta dacwaddiisu ay Maxkamad ku dhamaato ama loo wareejiyo Guddiga Anshax-marinta HSNQ, isla markaana, uu soo baxo go'aan caddeynaya in xubintu dembi-laawe yahay, go'aankuna noqdo mid kamadambeys ah; shaqo ka-joojinta waa laga noqonayaa.
4. Taliyaha Hay'addu wuxuu shaqa ka-joojin iyo xil ka-qaadisba ku sameyn karaa dhammaan Saraakiisha iyo hawl-wadeennada HSNQ, si waafaqsan Qodobka 12aad, faqradiisa (3) iyo Qodobka 15aad, faqradiisa (3) ee Sharciga HSNQ iyo Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 105aad
## Shaqo Ka-saaris

Taliyaha HSNQ oo keli ah ayaa xubin Hay'adda ka tirsan shaqo ka-saaris ku samayn kara, asagoo tixraacaya go'aan Maxkamadeed oo dhaqangal ah ama xeerinaya xaalad uu Sharciga HSNQ ama Xeer-nidaamiyahan oggol yahay in xubin shaqada looga saaro, si waafaqsan Qodobka 28aad, faqradiisa (2) ee Sharciga HSNQ.

## Qodobka 106aad
## Ka-xayuubin ama Dhimis Derejo

1. Derejo dhimis ama ka xayuubin waxaa keeni kara sababaha hoos ku xusan:
    a) **Sababo Asluubeed**; xubin kasta oo ka tirsan HSNQ ee ku dhaca gef culus oo liddi ku ah Asluubta iyo Anshaxa Ciidannimo; wuxuu muteysan karaa ganaax gaarsiisan derejo dhimis ama ka xayuubin, si waafaqsan Xeer-nidaamiyaahan;
    b) **Go'aan Maxkamadeed**; xubin kasata oo HSNQ ka tirsan ee ku dhaca fal-dembiyeed wuxuu muteysan karaa in lagu rido Xukun Maxkamadeed oo Derejo ka-qaadis ah, kaasoo ah ciqaab dheeraad ah ama raacsan ciqaab asal ah, si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Ciidamada.
2. Dableyda, Saraakiil-xigeennada iyo Kormeerayaasha ka tirsan HSNQ; waxaa derejo dhimis ama derejo ka-xayuubin ku samayn kara Taliyaha HSNQ.
3. Saraakiisha hoose, Saraakiisha sare iyo Sarreeyeyaasha ee HSNQ ka tirsan; derejo ka-xayuubin dhammeystiran cid aan maxkamad ahayn kuma samayn karto.
4. Derejo ka dhimista Saraakiisha ka tirsan HSNQ ee faqradda (3) ee Qodobkaan ku xusan; waxaa loo marayaa hannaanka hoos ku xusan:
    a) Taliyuha HSNQ wuxuu magacaabayaa guddi ka kooban shan (5) saraakaal oo uu san ku jirin qof ka derejo yar sarkaalka eedaysan ugu yaraanna hal (1) ka mid ah uu ka derejo sarreeyo, oo soo baara xaqiiqda iyo jiritaanka waxa sarkaalka lagu eedeynayo, ka dibna guddigu wuxuu soo saarayaa warbixin ay ku xusan tahay faahfaahinta eedda iyo soo jeedinta ciqaabta ku haboon in la saaro sarkaalka haddii lagu helo eedda loo tiiriyey;

b) Haddii guddigu soo jeediyo in sarkaalka derejada laga xayuubiyo ama laga dhimo; Madaxweynaha JFS ayaa xeer ku soo saaraya, ka dib soo jeedinta Taliyaha HSNQ.

## Qodobka 107aad
## Sababaha Xubin Xuquuqdiisa Looga Hakin Karo ama Looga Jari Karo

1. Xubin ka tirsan ciidanka HSNQ sababaha xuquuqdiisa qaar ama dhammaan looga hakin karo ama looga jari karo waxaa ka mid ah arrimaha hoos ku xusan:
   a) Go'aan Maxkamadeed;
   b) Ganaax Asluubeed;
   c) Shaqo ka-joojin;
   d) Waxyeelayn ama lunsasho qalab iyo hanti ay HSNQ leedahay;
   e) Fakad ama ku daahid fasax aan caadi ahayn sabab la'aan.
2. Hannaanka xubin xaq looga hakin karo ama looga jari karo waxaa la waafajinayaa Xeer-nidaamiyahan iyo Heer-hoosaadka HSNQ.

# CUTUBKA SAGAALAAD
# MUSHAARKA, GUNNOOYINKA IYO XAQSIINTA XUBNAHA HSNQ

### Qodobka 108aad
### Nidaaminta Xuquuqda Xubnaha HSNQ

Mushaaraadka, gunnooyinka iyo guud ahaan xuquuqda xubnaha Hay'adda; waxaa loo nidaaminayaa si waafaqsan Qodobdka 23aad iyo Qodobka 25aad ee Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer-hoosaadka Hay'adda.

### Qodobka 109aad
### Xaddiga Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha

1. Xaddiga mushaaraadka iyo gunnooyinka xubnaha HSNQ waxaa lagu salaynayaa xaddiga kororka Miisaaniyadda guud ee HSNQ.
2. Saldhigga mushaarka ee xubnaha ka tirsan HSNQ waxaa lagu salaynaa derejadiisa ciidannimo ama heerkiisa waxbarasho, qofkii labadaba isku haystana, waxaa mushaarkiisa lagu salaynayaa hadba kii u faa'iido badan.

### Qodobka 110aad
### Maamulka Iyo Maaraynta Maaliyadda HSNQ

Hannaanka maamulka iyo maaraynata maaliyadda HSNQ iyo habka bixinta mushaaraadka iyo gunnooyinka waxaa loo raacayaa si waafaqsan Xeer-hoosaadka HSNQ.

### Qodobka 111aad
### Hantida HSNQ

1. HSNQ waxaa ku soo wareegaya dhammaan hantida guurtada iyo maguurtada ah ee ay lahayd hay'addii Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NSS), si waafaqsan Qodobka 4aad, faqradiisa (4) ee Sharciga HSNQ.
2. Dhammaan hantida aan soo galin gacanta HSNQ waa in dib loo soo celiyo.

3. Hantida maguurtada ah ee HSNQ cidna lama siin karo, lagamana maarmi karo, isla markaana looma adeegsan karo wax ka baxsan danta shaqada Hay'adda.
4. Danta shaqada Hay'adda darteed haddii loogu baahdo in la iibiyo hanti maguurto ah oo ay Hay'addu leedahay; waa in ugu yaraan todoba (7) maalmood oo naado ah (auction) warbaahinta Dawladda loogu sameeyo, iyadoo loo marayo hab waafaqsan sharciygada iibka Qaranka.
5. Markii maalgelin lagu samaynayo mashaariicda ganacsi iyo hantida maguurtada ah ee HSNQ, si waafaqsan Qodobka 46aad ee Sharciga HSNQ; waa in la raadiyo fursadaha ugu waxtarka iyo faa'iidada badan HSNQ.
6. Taliyaha HSNQ wuxuu si toos ah mas'uul uga yahay ilaalinta iyo hubinta bad-qabka dhammaan hantida guurtada iyo maguurtada ah ee Hay'adda.

## Qodobka 112aad
## Maamuuska Iyo Mudnaanta Madaxda Sare Ee HSNQ

1. Madaxda sare ee HSNQ markii ay xafiisyada banneeyaan, haddii aysan ku waayin xukun Maxkamadeed oo dhaqangal ah dartiis; waxay yeelanayaan mudnaanta iyo maamuuska soo socda:
   a) Taliyaha HSNQ markii uu banneeyo xilka iyo xafiiska AG ee HSNQ wuxuu xaq u yeelanayaa; 50 % mushaarkiisa iyo gunnadiisa;
   b) Kaaliyaasha, Agaasimayaasha iyo Agaasime Waaxeedyada HSNQ haddii laga qaado xilka, waxay xaq u yeelanayaan; 50% mushaarkooda iyo gunnadooda;
   c) Mas'uuliyiinta ku xusan faqradda (1), xarfaha (a iyo b) ee Qodobkan; waxay kaloo xaq u yeelanayaan; in la siiyo gaadiid iyo ilaalo ku habboon mudnaantooda;
2. Mas'uuliyiinta faqradda (1) ee Qodobkan ku xusan, haddii ay qabtaan xil kale ee Dawladeed; waxaa ka go'aya wixii aan saldhigga mushaarka ahayn.

## Qodobka 113aad
## Hawlgabka iyo Xaqsiinta

1. Xubnaha ka tirsan HSNQ oo gaara da'da hawlgabka ee ku xusan Sharciga HSNQ; waxa ay yeelanayaan xuquuqda hawlgabka ee hoos ku xusan:

a) Xubinta gaara da'da hawlgabka wuxuu xaq u yeelanayaa 50% oo saldhigga mushaarkiisa ah;
b) Xuquuqda hawlgabka ee ku tilmaaman Qodobkan ma yeelanayaan xubnaha HSNQ haddii uu xukun maxkamadeed oo ciqaab ah ku dhaco;
c) Xubnaha yeelanaya xuquuqda hawlgabka; waa inay ugu yaraan shaqada Hay'adda ku jireen toban (10) sano;
d) Xubnaha hawlgabka ah oo ay ku timaaddo geeri, haddii ay ka tagaan caruur da'doodu ka yar tahay toban iyo sideed (18) sano; waxaa xannaano ahaan loo siinayaa lacagtii hawlgabka ilaa kan ugu yar caruurta uu ka gaarayo toban iyo sideed (18) sano, xannaanada caruurta lama siin karo loomana leexin karo cid kale.

2. Xubintii aqoon gaar ah oo uu leeyahay darteed aan looga maarmi karin waa loo dayn karaa shaqada, haddii aanu isagu codsan inuu shaqada ka fariisto.
3. Dhammaan xubnaha hawlgabka noqda waxaa ka reebban arrimaha ku xusan Qodobka 31aad ee Sharciga HSNQ kana warramaya waxyaabaha ka reebban xubnaha Hay'adda, waxaa sidoo kale, ka reebban arrimaha ku xusan Qodobka 42aad ee Sharciga HSNQ kuna saabsan shaacinta xog aan la fasixin.
4. Xubnaha hawlgabka ku jira waxaa saaran inay Hay'adda u soo gudbiyaan wixii xog sirdoon ah oo ay helaan, waxaana qabanaya sharciga iyo xeerarka HSNQ.

## Qodobka 114aad
## Ku Xadgudubka Qodobada Xeerka

Qof kasta oo ku xadgudba Qodobada Xeer-nidaamiyahan; waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan Sharciga HSNQ, Xeer-nidaamiyahan iyo Xeerarka Ciqaabta Ciidamada.

## Qodobka 115aad:
## Wax ka beddelka Xeer-nidaamiyahan

Golaha Wasiirradda ayaa wax ka beddel ku sameyn kara Xeer-nidaamiyahaan marka uuu Wasiirka Wasaaradda u soo jeediyo isagoo aragti ahaan qabo inay lagama-maarmaan u tahay ama muhiimad u leedahay dhaqangelinta ujeeddooyinka Sharciga HSNQ.

## Qodobka 116aad
## Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Golaha Wasiirrada JFS, islamarkaana uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.